**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA BATROOLKA IYO KHAYRAADKA MACDANTA**

# HINDISE SHARCIYEEDKA BATROOLKA 2017

Tusmo


CUTUB I QAWAANIIN GUUD ........................................................................................... 3

CUTUB II -HAY'ADAHA BATROOLKA……………………………………………………………………………………8

CUTUB III –RUQSADAHA HAWLGALLADA BATROOLKA ........................................................... 16

CUTUB IV--HAGIDDA HAWLGALLADA BATROOLKA ................................................................. 32

CUTUB V--MACLUUMAAD IYO BAARITAAN ............................................................................. 36

CUTUB VI--MACLUUMAAD SHAACSAN ..................................................................................... 39

CUTUB VII--XEER NIDAAMIYEIYE TILMAAMO ........................................................................... 41

CUTUB VIII--QAWAANIINTA DANBI IYO CIQAAB .......................................................................... 43

CUTUB IX--QAWAANIINTA DHAMAYSTIRKA AH ........................................................................... 47

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA**

**Wasaaradda Batroolka iyo Khayraadka Macdanta**

# Hindise Sharciyeedka Batroolka (2017)

Si waafaqsan Qodobada 7(1) iyo 44 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ee 2012, Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya wuxuu soo saarayaa sharciga soo socda ee ka dhaqangelaya dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya:

## CUTUBKA I – QAWAANIIN GUUD

### Qodobka 1

### Qeexidda Ereyada

Haddii aan si kale Sharcigaan loogu macneyn, erayada hoos ku qoran waxay leeyihiin macnahaan:

"**Ruqsad**" waxaa ka mid ah Ruqsad Sahan Indho-indheyn, Ruqsad Ka-Hawlgal Dhulka Dushiisa, Heshiis Wax soosaar Wadaag iyo oggolaansho kasta oo ay Xukuumaddu bixisey lana xiriira Ruqsada;

"**Aag Ruqsadeysan**" waa aagga Ruqsadu ku saabsan tahay;

"**Qof Ruqsadle ah**" waa Qofka ku magacaaban Ruqsad la bixiyey;

"**Hab-dhaqanka Caalamiga ee ugu wanaagsan**" waa hab-dhaqannada iyo hab-raacyada ay dadka feejigan ee taxaddiraya u adeegsadaan hawlgallada batroolka guud ahaan caalamka, marka ay ku sugan yihiin xaalado iyo duruufo la mida kuwa hore loo soo marey oo la xiriira marxalad ama marxalado muhiim ah ee Hawgallada Batroolka, gaar ahaan kuwa xaqiijinaya:

(a) ilaalinta wixii khayraad Batrool ah oo loola jeedo adeegsiga habab iyo habraacyo suurageliya in la soo saaro tirada ugu badan ee Batrool oo farsamo ahaan iyo dhaqaale ahaan meel-mar noqon karta iyo in laga taxaddiro hoos-u-dhac ku yimaada keydka batrool ayada oo la adeegsanayo mabaadída sare u qaadidda wax soosaarka iyo mabaadída kale ee ilaalinta iyo hoos u-dhigidda wixii batrool ah ee ku lumaya dhulka dushiisa;

(b) badqabka hawlgallada, waa adeegsiga habab iyo habraacyo dhiirrigelinaya badbaadada shaqaalaha iyo ka hor-tagga wixii shilal ah;

(c) ilaalin bii'adeed, ee ku baaqaysa yagleelidda habab iyo habraacyo ee yareynaya saameynta ay Hawlgallada Batrool ku leeyihiin bii'ada;

"**Xirmo (Block)"** waa aag u tilmaaman si xirmo (block) ah oo ku asteysan khariidad lehna koordinaydyo juquraafi cayiman oo ay Wasaaraddu, si waafaqsan sharciga, u qoondeysay in Ruqsad lagu bixiyo;
"**Aag Heshiis**" waa Xirmo (Block) ama xirmooyin (Blocks) lagu bixiyey Ruqsad;

"**Kontrool"** waxaa looga jeedaa, marka lala xiriirinaayo Qof , awoodda uu Qof kale ku leeyahay si uu u xaqiiqsado:
(a) ayada oo uu adeegsanayo lahaanshaha saamiyo ama haysashada awood codbixin, oo la xiriira Qofka koowaad ama Qof kasta oo kale; ama
(b) ayada oo uu adeegsanayo awood lagu siiyay dastuurka (shirkadda), ama dokumenti kale oo nidaaminaya, qofka koowaad ama qof kastoo kale, in arrimaha qofka koowaad loo socodsiiyaa si waafaqsan rabitaanka ama tilmaamaha qofkaas kale;

"**Saliid Ceyriin"** waa macdan saliid aan la sifeyn iyo dhammaan hydrocarbonada dareera ee ku sugan xaaladdooda dabiiciga ah, ama laga miiray gaaska dabiiciga ama kala miirid;

**"Furfurid (Decommissioning)"** waa, marka loo fiiriyo aag Ruqsad loo haysto ama qayb ka mida, hadba kii uu yahay, ka tagid, furfuris, wareejin, ka qaadis iyo/ama ka takhalusid wixii dhismo, saldhig shaqo, dhismooyin rakiban, qalab iyo hanti kale, iyo tacab kale, oo loo isticmaalay Hawlgallo Batrool oo ka socday aagga, nadiifin aagga Ruqsadu ku saabsan tahay lagana dhigo meel hagaagsan oo ammaan ah, oo dhowraysa bii'ada sí waafaqsan sharciga;

"**Qorshe Furfurid**" waa qorshaha soo afjaridda Hawlgallada Batroolka, sii isticmaalka ama furfurista saldhigyada shaqo ee la xiriira Hawlgallada Batroolka si waafaqsan Qodobka 32 ee Sharcigan;

"**Qorshe Horumarin**" waa qorshaha ku lifaaqan codsiga Ruqsad horumarin ee ay si faahfaahsan ugu tilmaaman tahay soo bandhigista dhismooyinka, goobaha iyo hawlaha guud ahaan saldhigyada shaqo iyo adeegyada loo diyaariyay soo saarista, habeynta, kaydinta iyo daabuleynta batroolka laga keenaayo aagga horumarinta ee la soo bandhigay, iyo qorshaha tababarista iyo shaqaaleynta Soomaalida.

"**Saldhig shaqo**" waxaa loola jeedaa:
(a) qaab-dhismeed , aalad ama wax kale oo la xiriira ee dhismo-rakiban ama kaabayaasha ay ka mid yihiin dhuumaha (pipelines), goobaha waalka (valve stations), saldhigyo bam, saldhigyada kombarasoorrada iyo qalab la dhisay, la dhigay ama loo isticmaalo si ay u fuliyaan hawlgallo batrool;
(b) markab, baabuur ama diyaarad markaa taagan oo loo isticmaalay qodista ama lagu kaabo hawlaha batroolka socda; iyo
(c) markab, baabuur ama doon loo isticmaalo daabulaad batrool jumlo ah marka uu ku xiran yahay Saldhig shaqo oo loo adeegsado raritaan batrool;

**"Naqshadeyn**" waa u kala qeybinta oogada dhulka si Xirmooyin (Blocks) ah oo u diyaarsan Hawlgallo Batrool;

"**Xukuumad**" waa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya oo ku ficil qaadeysa saraakiisheeda, hay'adaheeda, wakaaladaheeda ama wasiirradeeda, sida uu go'aamiyey Golaha Wasiirrada;

" **Kormeere ( Inspector)**" waxa uu leeyahay macnaha ay siisay Faqradda (1) ee qodobka 34;

"**Sharci**" macnihiisu waa Sharcigaan Batroolka iyo hadba wixii isbeddel lagu sameeyo;

"**Wax ku-kordhinta Deegaanka** (**Local Content**)" waxaa loola jeedaa horumarinta kartida shaqo ee Soomaalida (oo ay ka mid noqon karaan tababarro kobcin karti, tababar shaqo iyo deeqo waxbarasho), soo wareejin aqoon iyo farsamo la xiriirta saliidda iyo gaaska, shaqaaleynta shaqaale Soomaaliyeed iyo isticmaalka alaabta Soomaaliya lagu sameeyey ama lagu dhameystiray.Waxaa sidoo kale ka mid noqon kara taageero dhaqaale ama nooc kale ah oo xoojineysa adeegyada dadweynaha iyo kaabayaalka dhaqaalaha.

"**Wasaarad**" waa Wasaaradda mas'uulka ka ah Batroolka;

"**Wasiir**" waxaa loo la jeedaa Wasiirka Batroolka;

"**Gaaska dabiiciga ah**" waxaa loola jeedaa dhammaan haydarokarbonnada qaab gaas ah, oo ay ku jiraan gaaska macdanta ee qoyan, gaaska macdanta ee qallalan, haamo ku shubid gaas iyo wixii gaas haray, ka dib markii, haydarokarbonnada dareere ah laga miiray gaas qoyan, laakiin aan ahayn saliid ceyriin;

"**Hawlfuliye**" waxaa loola jeedaa Qof Ruqsadle ah ama Qof kale ee oo ku magacaaban Ruqsad ama Heshiis Mideyn si uu u abaabulo una kormeero Hawlgallo Batrool;

"**Qof**" waxaa loola jeedaa shirkad ama hay'ad kale ee sharci ah;

"**Batrool**"waxaa loola jeedaa:
(a) haydarokarbon kasta oo si dabiici ku askunmay, ha ku jiro xaalad gaas, dareere ama adke;
(b) iskujir kasta oo hydarokarboonno ah, ha ku jiro xaalad gas, dareere, ama adke.

"**Hawlgallo Batrool**" waxaa loola jeedaa hawlo looga danleeyahay:
(a) bidhaamin (prospecting) Batrool;
(b) sahan ,horumarin, soo-saarid, iib ama dhoofin Batrool;
(c) dhisid, rakibaad qalab ama fulin dhismooyin, goobo dhisme ama Saldhig-shaqo ama waxyaabo isku rakib ee looga golleeyahay, horumarin,wax soosaar, daabulid, iyo dhoofin batrool, ama Furfurid, meel ka-saarid dhismooyin, Saldhig-shaqo ama qalab rakiban;

"**Heshiis Wax Soosaar Wadaag** " waxaa loola jeedaa heshiis lagu galay si waafaqsan Qodobka 19 ee Sharcigaan.

"**Sarkaal Dawladeed**" waxaa loo la jeeda qof xil ka haya xafiis dawladeed ama shaqaale dawladeed ah oo mushaar qaata, oo ay ku jiraan saraakiisha heer Dawlad Gobaleed, xubnaha iyo shaqaalaha Hay'adda Batroolka ee Soomaaliya iyo Shirkadda Batroolka ee Qaranka Soomaaliyeed;

"**Ruqsad Sahan Indha-indheyn**" waxaa loola jeedaa ruqsad lagu bixiyey si waafaqsan Qodobka 17;

"**Xeernidaamiye**" waxaa loola jeedaa xeerar iyo xeernidaamiye ay Wasaaraddu soo saarto hadba markii loo baahdo si ay u maareyso Hawlgallada Batroolka, si waafaqsan Sharcigan.

"**Keyd (Reservoir)**" waxaa loola jeedaa lakab dhulka hoostiisa ah oo leh dulduleello yaryar oo ay ka soo maaxan karaan biyo iyo hawo uu ku jiro haydarokaarbono (saliid iyo/ama gaas) la soo saari karo oo si dabiici ah ugu aruuray, isla mar ahaantiina ah mid ku dhex dahaaran dhagax kale iyo/ama xijaab biyood ee uu astaan u yahay hal nidaam cadaadis dabiici ah;

"**Qandaraas-hoosaadle**" waxaa loola jeedaa hay'ad ganacsi ee uu kiraystay Qof Ruqsad haysta si uu u fuliyo dhammaan ama qayb ka mid ah Hawlgallo Batrool sidii Qof Ruqsad haysta ayada oo la raacay shuruudaha ku qoran Ruqsadda ;

"**Shirkad Dawlad Goboleed**" waxaa loola jeedaa shirkad lagu dhisay Sharciyada Soomaaliya oo ay, si toos ama dadban, u kontroosho Dawlad Goboleed xubin ka ah Dawladda Federaaalka ee Soomaaliya;

"**Hay'adda Batroolka ee Soomaaliyeed** " ama "HBS" waxaa loola jeedaa Hay'adda ku xusan Qodobka 13 ee Sharcigan;

"**Shirkadda Batroolka ee Qaranka Soomaaliyeed** " ama "ShBQS" waxaa loola jeedaa shirkadda la dhisi doono ee ku xusan Qodobka 14 ee Sharcigan;

"**Ruqsad Ka-hawlgal Dhulka Dushiisa**" waxaa loola jeedaa Ruqsad lagu bixiyey si waafaqsan Qodobka 19 ee Sharcigan;

"**Ceel**" waxaa loola jeedaa god oogada dhulka laga qoday si looga soo saaro Batrool.

## Qodobka 2

## Aas-aaska Sharciga Batroolka

Si waafaqsan Qodobbada 7(1) iyo 44 Dustuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, 2012, Sharcigaani wuxuu ka dhaqangelayaa dhammaan dhulka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

## Qodobka 3

## Lahaansha Batroolka

Kheyraadka Batroolka waa hanti qaran oo ay wada leeyihiin dhamaan shacabka Soomaaliyeed, oo ay wakiil u yihiin Dowlada Federaalka Soomaaliya iyo dowlad goboleedyada xubnaha ka ah.

## Qodobka 4

## Qaybinta Dakhliga Batroolka

Dakhliga Batroolka waxaa loo qaybinayaa Xukuumadda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah, si faa'iido u leh dalka oo dhan ee waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

## Qodobka 5

## Hababka Xafididda iyo Ilaalinta Batroolka, soosaaridda kaddib

Xukuumadda waxay mas'uul ka tahay ilaalinta amniga shirkadaha batroolka iyo hawlaha qodidda batroolka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 6

## Ilaalinta Bii'áda

Xukuumadda, Dawladgoboleedyada iyo Shakhsiyaadka Ruqsadleyda ahi waa inay dhowraan bii'ada dabiiciga iyo bii'ada dhisan, si waafaqsan sharciyada Jamhuuiyadda Federaalka ee Soomaaliya iyo habdhaqanka caalamiga ee ugu wanaagsan.

## Qodobka 7

## Ujeeddada Sharciga

(1) Ujeeddada Sharcigan waa:

(a) in la sugo in Soomaaliya ay u madaxbanaan tahay xuquuqdeeda sahan, horumarin, soo-saaris, isticmaal iyo maareyn ee khayraadkeeda Batrool ee berriga iyo badda;

(b) in la oggolaado in dadaal loo galo cayimidda baaxadda khayraadka Batrool ee ka jira Soomaaliya, ayadoo la abuuraayo haykal nidaam, heshiis iyo dhaqaale oo ogolaanaaya indha-indheyn iyo sahan Batrool, iyo horumarinta, soosaarista iyo suuqgeynta wixii Batrool ah ee la helay;

(c) haddii khayraad batrool laga helay Soomaaliya, in dalka iyo dadka Soomaaliyeed ay faa'iidada ugu badan ka helaan soo saaridda iyo horumarinta batroolkaas;

(d) in la xaqiijiyo ilaalinta, xafidaadda iyo dhowrista bii'ada inta la wado Hawgallada Batroolka;

(e) in la dhiirrigeliyo iyo in la taageero maalgashi ajnabi si loo gaaro ujeeddooyinka kale ee Sharcigan;

(f) in la dhiso Hay'adda Betroolka ee Soomaaliyeed oo ah Hay'adda u xilsaaran nidaaminta Hawlgallada Batroolka, ayadoo la dhaqangelinaayo mabadiida sharci ee sinnaanta, furnaanta, isla-xisaabtanka, daahfurnaanta iyo hayb-sooc la'aanta;

(g) in la jideeyo dhisid Shirkadda Batroolka ee Qaranka Soomaaliyeed ee ah shirkad hoos timaaada ayna kontroosho Xukuumadda xagga ka-qaybgalka hawlgallada batroolka ee laga wado dalka Soomaaliyeed gudahiisa;

(h) in loo hoggaansamo dhaqdhaqaaqa caalamiga sí loo xaqiijiyo daah-furnaanta wax-soosaarka macdan dhuleedka, ayada la xoojinayo maamulka dhaqaalha dawladda iyo isla xisaabtanka, ayada oo la garwaaqsanayo in maamulka khayraadka dabiiciga u socdo sí ay faa'iido ugu jirto muwaadiniinta Soomaaliyeed tahay awood Xukuumadda u gaar ah oo ay tahay in loo isticmaalo horumarinta danaha Qaranka; iyo

(i) in la xaqiijiyo u-caddaalad falidda dadka cayiman ee leh xuquuq la xiriirta ruqsado baaritaan batrool oo ay Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya bixisey 30 Disember 1990 iyo wixii ka horreeyey.

**Qodobka 8**

**Dhulka Dhaqangalka Sharciga**

Sharcigan waxaa laga dhaqangelinayaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

**Qodobka 9**

**Baaxadda Maaddo ee Sharciga**

(1) Baaxadda:

Sharcigaan waxaa lagu dhaqayaa Hawgallada Batroolka.

(2) Macaadin kale.

Jiritaanka Ruqsad ka shaqaysa Aag cayiman ma reebeyso in la bixiyo ruqsad baaritaan iyo soosaarid walxo macdaneed ee ka duwan batrool, haddii mudnaanta ay lahaanayaan Hawlgallada Batroolka oo aysan hawlaha kale carqalad ku ahayn habsami u socodka Halwgallada Batroolka.

**Qodobka 10**

**Lahaanshaha Batroolka**

(1) Lahaanshaha iyo kontroolka, Batroolka ku jira Dhulka Soomaaliya waa hanti guud ah oo ay Dawladda Federaalka ammaano ahaan ugu haysto dadkeeda.

(2) Qof wuxuu batrool sí sharci ah ku yeelan karaa oo kaliya ka dib marka si buuxda loo soo saaro ayada oo loo adeegsanayo Heshiis Wax soosaar Wadaag oo waafaqsan Sharcigan.

## CUTUBKA II – HAY'ADAHA BATROOLKA

**Qodobka 11**

**Isticmaalka Awoodaha iyo Hawlaha ee Wasaaradda iyo Hay'adda Batroolka**

(1) Adeegsi Awood iyo Gudasho Xil.

Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed iyo Wasaaradda waa in ay, awoodahooda iyo xilalkooda ku xusan Sharcigaan iyo Xeernidaamiyaha oo ay ku jiraan kuwa ku cad Ruqsadaha lagu bixiyey, u adeegsadaan una gutaan si munaasib ku ah :

(a) in la xaqiijiyo maamul khayraad miisan leh;

(b) in la xaqiijiyo in batroolka loo soosaaro, loogana shaqeeyo hab yaraynaya khasaare gaaraya bii'ada, sí waafaqsan sharcigaan, dhaqaale ahaan meel mar ah qaybna ka qaadanaya horumarka Soomaaliya ee waqtiga fog;

(c) ah mid maangal ah;

(d) waafaqsanna habdhaqanka caalamiga.

(2) Fursad Dhegaysi.

Ka hor inta aysan adeegsan awooddaas ama aysan gudan xilkaas, Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed iyo Wasaaradda waxaa ay fursad siin karaan Shakhsiyaadka ay arrintu saamayn ku yeelan karto si ay ugu soo gudbiyaan qoraalo, waxayna siinayaan (qoraaladaas) loo soo gudbiyey tixgelin .

**Qodobka 12**

**Hawlaha Wasaaradda**

(1) Wasaaradda waxay gudanaysaa hawlaha soo socda:

(a) waxay sameyneysaa go'aammada ku saabsan istratejiyada, qorshaha iyo siyaasadaha lagu hormarinayo wax soosaarka Batroolka la xiriira;

(b) waxay galeysaa heshiis kasta ee Waxsoosaar Wadaag si waafaqsan qodobka 18aad (2);

(c) waxay soo saareysaa Xeernidaamiye lagu maareeyo Hawlgallada Batroolka sida ay Wasaaradda kula talisay HBS waafaqsanna Sharcigaan.

(d) in ay sameyso go'aammo la xiriira siyaasadaha iyo qaababka iskaashiga dowladaha iyo shirkahada shidaalka caalamaiga ah, iyo;

(e) in ay maareyso habraaca u bedelista heshiis Wax soosaar Wadaag xuquuqdii ka dhalatay ruqsadihii ay bixisay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya 30kii Disember 1990 ama ka hor, si waafaqsan qodobka 44aad.

(2) Hawlo dheeraad ah

Xukuumadda waxay u xilsaari kartaa wasaaradda wixii hawlo dheeraad ah ee la xiriira nidaam u-dejinta iyo kormeerka Hawlaha Batroolka iyo, haddii ay munaasib tahay, arrimo la xariira hawlaha dheeraadka ah.

(3) Xog-ilaalinta Wasaaradda

Saraakiisha Dawladda, marka ay gudanayaan waajibaadkooda sharciga ah, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan xogaha ganacsi ay ka ogaadeen dadka iyo shirkadaha, haddii Wasaaraddu ku qanacsan tahay in:

(a) shaacinta macluumaadka macquul ahaan laga fili karo in ay khasaare ama faa'iido uga dhalato qof ay si toos ah u saameeyeen howlaha Wasaaradda, ama in laga fili karo in ay wax u dhimaan kaalinta tartanka qofka; ama

(b) macluumaadku yahay macluumaad dhaqaale, ganacsi ama farsamo ee ah macluumaad sir ah oo loo gudbiyey Wasaaradda, macluumaadkaas oo qofka, ay saamaynta ku yeesheen hawlaha Wasaaradda, u tixgeliso macluumaad sir ah iyo in Wasaaraddu u tixgeliso danta ugu qofka, hawlaha wasaaraddu saameeyeen, sir ahaanshaha ay ka culus tahay tan danta uud ee ku jirta in la faafiyo.

**Qodobka 13**

**Dhismaha iyo Hawlaha Hay'adda Batroolka ee Soomaaliyeed (HBS)**

(1) Dhismaha HBS.

Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxaa lagu dhisay Sharcigan waxayna ahaaneysaa Hay'adda u xilsaaran in ay nidaamiso Hawlgallada Batroolka.

(2) Waqtiga Dhismaha

HBS waxaa la dhisayaa oo ay awood u yeelaneysaa isticmaalka awoodaheeda waqtiga ay Xukuumadd cayinto. Inta ka horeysa waqtigaas, hawlaha iyo awoodaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxaa mas'uul ka ah Wasiirka, asagoo kaashanaya Guddi Farsamo oo Wasaaradeed. Xukuumaddu waxay dhisaysaa Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed markii ay ku qanacdo in caddadka hawlgallada batroolka ka socda Soomaaliya ay gaareen heer qiil u saameyn kara dhaqaalaha ku baxaya dhismaha Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.

(3) Xubnaha HBS.

(a) Guddiga HBS wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood, saddex (3) waxaa soo magacaabaya Xukuumadda, ayadaoo lixda Dawlad-goboleed ay mid kasta soo magaabayso mid ka mida lixda (6) xubnood ee harsan ee matala.

(b) Quwoorumka Guddiga waxaa uu ku ansaxayaa shan (5) xubnood.

(c) Xagga xubin ka noqoshada Guddiga waa in tixgelin la siiyo miisaanka jinsiga.

(d) Xubnaha waxay xilka haynayaan shan sano ayadoo loo cusbooneysiin karo hal xilli oo kaliya, laakiin Xukuumadda way ka qaadi kartaa mar kasta oo sababi jirto. Sababaha xilka looga qaadi karo waxaa ka mida ku xadgudubka faqradaha (8) ama (9) ee qodobka 13 ama uu lumiyey sida ku cad tilmaamaha faqradda (5) ee qodobka13.

(4) Shaqaalaha HBS

(a) Xoghayaha Guud iyo shaqaalaha aan looga maarmeyn fulinta hawlaha HBS waxaa lagu shaqaaleynayaa xeerka shaqaalaha rayidka ah ee Lambar 11 ee 05.12.2006.

(b) Xoghayaha Guud waa Madaxa Maamulka Lacagta wuxuuna ka mid noqonayaa shaqaalaha joogtada ee HBS.

(c) Xoghayaha Guud waa in uu waayo.aragnimo iyo aqoon la caddeeyey u leeyahau ugu yaraa mid ka mida majaalada soo socda:

(i) cilmiga jiyosayniska ee batroolka ama injineernimada;

(ii) caafimaadka, amaanka iyo arrimaha bii'ada;

(iii) Sharciga;

(iv) maareynta ama maamulka ganacsiga;

(v) dhaqaalaha ama maaliyadda; ama

(vi) handasada sifeynta batroolka ama kiimikada iyo habka.

(5) Shuruudaha Xubinimo.

(a) Xubnuhu waa in ay leeyihiin niyad wanaag, hufnaan iyo hawlkarnimo la caddeeyey.

(b) Dhammaan xubnaha waa in ay noqdaan muwaadiniin Soomaaliyeed:

(c) Qofna looma magacaabi karo mana sii ahaan karo xubin ka tirsan HBS, haddii qofkaasi yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, ku hawlan arrimo soo saarid, iibin, gadid, gudbin, dhoofin, soo-dejin ama si kale uga ganacsada batrool Soomaaliya gudaheeda ka haysta shahaado caddaynta deynta, waajib ama damaanaad kale ee shirkad ku hawlan hawlo ganacsi ee la mid ah.

(d) Qofka waa in uusan ahayn qof ku xukuman dembi ku xusan Sharcigan ama dembi ku lug leh daacad-darro ama khiyaano oo ay ku xukuntay maxkamad awood u leh ee ku taal gudaha ama dibedda Soomaaliya.

(6) Shuruudaha Shaqaalaynta.

(a) Qofna looma magacaabi karo kamana sii tirsanaan karo shaqaalaha HBS, haddii qofkaasi yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, kuna hawlan arrimo soo saarid, iibin, gadid, gudbin, dhoofin, soo-dejin ama si kale uga ganacsada batrool Soomaaliya gudaheeda ama haysta shahaado caddayn deyn , waajib ama damaanaad kale ee shirkad ku hawlan arrimo ganacsi ee la mid ah.

(b) Magacaabis kasta ee la xiriirta u-shaqaynta HBS aaa in ay ku saleysan tahay mudnaan.

(7) Guddoonka HBS.

(a) Golaha Wasiirrada ayaa ka magacaabaya Guddoomiye iyo Gudoomiye ku xigeen xubnaha HBS.

(b) Guddoomiyaha Guddiga HBS wuxuu leeyahay mas'uuliyadda kormeerka iyo hagidda shaqada iyo shaqaalaha HBS.

(c) Haddii Guddoomiyuhu maqan yahay ama uusan awoodin in uu xilka guto, Guddoomiye Ku-xigeenka waxa uu yeelanayaa dhammaan awoodaha iyo xilalka Guddoomiyaha.

(d) Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka Guddoomiyaha waa in ay u leeyihiin aqoon iyo waayo-aragnimo culuumta hawlaha batroolka sida cilimiga joolojiyada, handasada, dhaqaalaha, maaliyadda ama sharciga.

(8) Waajibaadka Xubnaha Guddiga iyo Shaqaalaha

Xubnaha Guddiga iyo Shaqaalaha HBS waxay waajibaadkooda u gudanayaan sí amaano ku jirto, shaqadoodana u gutaan sí waafaqsan sharciga, ayna ahaadaan dhexdhexaad iyo daacad. Waa in aysan marnaba uga faaideysan xilkooda si ay u helaan macaash sharci daro ah.

(9) Xog-ilaalinta HBS.

Marka HBS Xubnaha Guddiga iyo shaqaalaha ay gudanayaan waajibaadkooda sharciga ah, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan oo aysan faafin xogaha ganacsi ee dadka iyo shirkadaha gaarka ah oo ay ogaadaan, haddii HBS ay ku qanacdo in:

(a) Shaacinta macluumaadka, wuxuu maangal ahaan sababi karaa in ay khasaare ama faaiido uga dhalato dadka ay saamaynta tooska ku yeelanayaan hawlaha HBS ama wuxuu si maangal ah u dhaawici karaa tartanka suuqa ee qofkaas; ama

(b) Macluumaadku yahay mid maaliyadeed, ganacsi, sayniseed ama akhbaar farsamo oo sir ah oo loo keenay HBS, macluumaadkass oo ay dadka hawlaha HBS saameynta tooska ku leedahay u haystaan macluumaad sir ah, isla mar ahaantaasna HBS ay ku qanacsantahay in danta shakhsiga ee ugu jirta ilaalinta sirta ay ka culus tahay tan danta guud ee ku jirta in la faafiyo.

(10) Xarunta HBS.

Xarunta HBS waxa ay ahaaneysaa Muqdisho. Haseyeeshee, si waafaqsan faqradda (11) ee Qodobkaan, HBS waxa ay laamo ka furan kartaa Dawladaha xubinta ka ah JFS.

(11) Waajibka HBS.

HBS waxa ay nidaam u dejinaysaa Hawlgallada Batroolka, si waafaqsan Sharcigan iyo Shuruucda kale ee Soomaaliya.

(12) Hawlaha HBS.

HBS waxa ay gudanaysaa hawlaha soo socda:

(a) In ay nidaamiso kormeerka, wax ka bedelidda iyo meel-marinta ruqsadaha, iyadoo soo saareysa go'aammo, awaamiir iyo tilmaamo ku cad sharcigaan iyo xeernidaamiyaha fulintiisa, si ay u socodsiiso hawlgalada batroolka si waafaqsan qawaaniinta sharcigaan.

(b) In ay hubiso khibradda Qofka Ruqsadlaha ah, ayadoo ay ku jirto, hubinta Qofka Ruqsadlaha ah awooddiisa dhaqaale iyo farsamo ahaan yahayna mid isku filan oo ay ku fuliyaan waajibaadkooda.

(c) In ay meelmariso xaqiijisana in ay u hogaansan yihiin shaqsiyaadka muhiimka ah ee Ruqsad walba, xeerka, go'aanka, amarka iyo tilmaanta ay bixisay HBS si waafaqsan sharcigaan; iyo

(d) In ay deristo oo ay dib u eegis joogto ah ku sameyso arrimaha la xiriira wax soosaarka Batroolka, sida ay Wasaaraddu ka dalbatay HBS, ayna si muddooyin taxana ah uga warbixiso arrimahaas, ayna tilmaanto tillaabooyinka ula muuqda muhiim ama maslaxada danta guud si loo koontaroolo oo loo hormariyo wax soosaarkaas.

Xukuumaddu, ayada oo raacaysa talada Wasiirka, waxa ay HBS siin kartaa hawlo dheeri ah ee la xiriira nidaamarinta, kormeerka iyo kontroolka Hawlgallada Batroolka iyo, markii ay munaasib tahay, arrimo ku lamaan hawlaha ay hadda hayso HBS.

(14) Awoodaha HBS.

Marka ay gudaneyso xilalkeeda sida sharcigu qabo, HBS waxa ay yeelanaysaa awoodaha soo socda:

(a) In ay bixiso Ruqsado Sahan Indho-indheyn, si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobka 17;

(b) In ay gasho wada xaajood, diyaarisana Heshiiska Wax soosaar Wadaagga si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobka 18;

(c) In ay bixiso Ruqsadaha Ka-Hawlgalka Dhulka Dushiisa si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobka 19;

(d) In ay bixiso ka-dhaafitaanno (exemptions), si waafaqsan Qodobka 28;

(e) In ay wax-ka-beddesho iyo in ay la noqoto Ruqsada kasta, si waafaqsan Sharcigan, Xeernidaamiyaha fulintiisa iyo qawaaniinta Ruqsada;

(f) In ay soosaarto ayna fuliso tilmaamo lagu xaqiijinayo u-hoggaansanka waajibaadka Ruqsada;

(g) In ay u kuur-gasho, dhegeysato go'aanna ka gaarto arrin kasta, haddii HBS ay ula muuqato in qof uu ku fashilmay in uu sameeyo ficil, arrin ama wixii kale ee waajibkiisa ahaa in uu sameeyo, si waafaqsan Sharcigaan, Xeernidaamiyaha ama Ruqsad kasta, go'aan, amar ama tilmaan ay sameysay HBS;ama qofkaasi uu sameynayo, arrin ama wax ka soo horjeeda ama khilaafsan Sharcigan, Xeernidaamiyaha, ama lid ku ah qawaaniinta Ruqsada, go'aan, amar ama tilmaan;

(h) In ay amarto ama ka dalabto qofkii ay quseyso in uu sameeyo, waqtiga ay cayinto iyo sida ay u tilmaanto, ficil, arrin ama wax qofkaasi waajib ku ah ama ku ahaan kara sida ku cad Sharcigaan, xeernidaamiyaha, Ruqsada, xeer, ama go'aan, amar ama tilmaan ku saleysan Sharcigaan; iyo in ay mamnuucdo sameyn ama sii wadid sameyn ficil, arrin ama wax lid ku ah Sharcigaan, xeernidaamiyaha amma Ruqsad, xeer, go'aan ama tilmaan;

(i) Wixii la xiriira arrimaha la soo sheegay, in ay uruuriso macluumaad, oo ay ka mid tahay ku amarto soo gudbin macluumaad Qof Ruqsadle ah oo kasta;

(j) In ay ganaax u cayinto ku xadgudub Ruqsad, go'aan, amar ama tilmaamaha HBS, si waafaqsan waafaqsan cutubka 3aad;

(k) In ay ka shaqeyso iskaashiga hay'adaha nidaaminta ee wadamada shisheeye, wasaaradaha iyo hay'adaha mas'uulka ka nidaaminta ee wadamada deriska ah wixii la xiriira Hawlgallada Batroolka ee xuduudadha ka gudba;

(l) In ay hayso Diiwaanka Batroolka;

(m) In ay dejiso xeerar, si waafaqsan faqradda (17) iyo (18) ee Qodobkan; and

(n) In ay iskeed ugu kuur-gasho, dhegeysato, go'aanna ka gaarto arrin kale ama wax kasta si waafaqsan Sharcigaan ama Xeernidaamiyaha, ay awood u leedahay in ay u kuur-gasho, dhegeysato, go'aanna ka gaarto

(15) Baaris.

Waa waajibka HBS in ay baarto ama ay amarto in la baaro in shuruudaha ama waxyaabaha looga baahnaa Ruqsad la khilaafay iyo in kale.

(16) La Shaqaynta HBS.

Marka HBS, xubnaheeda iyo shaqaalaheeda ay gudanayaan hawlahooda sharciga, shaqsiyaadka iyo shirkadaha la kormeerayo ama la baarayo waa in ay la shaqeeyaan waana in dhiibaan wixii dokumentiyo waxyaabo kale ah ee run ah. Shaqsiyaadkaasi iyo shirkadahaasi ma diidi karaan la shaqaynta, mana carqaladeyn karaan baarista iyo u kuur-galka, mana qarin karaan dokumenti muhiim ah ama waxyaabo kale.

(17) Xeerarka Hawlgal ee HBS.

Hay'adda Batroolka ee Soomaaliya, ayadoo la tashatay Wasaaradda, waxay sameyn kartaa xeerarka ay u aragto lagama maarmaan ama munaasib marka loo fiiriyo waajibaadkeeda iyo hawlaheeda, kuwaas oo ay ka mid yihiin xeerar dejinaayo shuruud ama mamnuucaya qaab dhaqan ganacsi ee Qof Ruqsadle ah oo kasta, si ay u sugto habsami u socodka Hawlgallada Batroolka ee Soomaaliya. Xeerarka lagu soo saarey si waafaqsan Faqrada (17) ee Qodobka 13aad, kuma lahaanayaan wax saameyn ah oo wax ka bedelid ah ama dhalan-rog ah qawaaniinta ama shuruudaha Ruqsad walba. Wax ka bedelidda iyo dhalan-rogga Ruqsadaha waxaa lagu sameyn karaa oo kaliya si waaafaqsan Qodobka 28 ee Sharcigaan.

(18) Xeerarka Habraaca ee HBS.

HBS waxa ay sameyn kartaa xeerar ku saabsan fadhiyada HBS, habraaca codsiyada, qoraalada iyo cabashooyinka iyo sida ay u qaadayso dacwooyinka la horkeenay HBS, iyo qaabka loo wajahayo arrin kasta oo la horkeeno HBS, maareynta arrimaheeda gudaha iyo waajibaadka shaqaalaheeda. Marka ay sameyneyso xeerarkaan, HBS waa in ay ku darto mabaadiida furfurnaanta, daahfurnaanta, la-xisaabtanka iyo madaxbannaanida.

(19) Dukumentiyada Caamka.

Hay'adda Batroolka ee Soomaaliya waxa ay dadweynaha u fureysaa:

(a) Xeerarka ay dejisay HBS, si waafaqsan faqrada (17) iyo (18) ee Qodobkan;

(b) Go'aamada, amarrada iyo tilmaamaha HBS;

(c) Ciqaabaha ay soo rogtay HBS;

(d) Nooca forms-ka Ruqsada Sahanka Indho-indheynta, Ruqsada Ka-Hawlgalka Dhulka Dushiisa ama Heshiiska Wax soosaar Wadaaga; iyo

(e) Ruqsadaha ay soo saartay HBS.

(20) Kaalinta Wasaaradda.

Wasaaraddu waxa ay tilmaamo siyaasadeed ee guud siineysaa Hay'adda Batroolka ee Soomaaliyeed xagga wixii la xiriira gudashada hawlaha ku sugan Sharcigan iyo

Xeernidaamiyaha. Tilmaamaha hagida siyaasadda guud ee ay Wasaaraddu u soo saartey HBS, waxa Wasaaraddu ku faafinaysaa sida loo faafiyo shuruucda iyo arrimaha siyaasadeed ee kale. Marka ay gudaneyso waajibaadkeeda ku cad Sharcigaan iyo Xeernidaamiyaha, HBS waxay tixgelin siineysaa tilmaamaha siyaasadeed ee Wasaaraddu soo saartey.

(21) Racfaan

Marka laga reebo arrimaha ku cad faqradda (21) ee Qodobkaan, wax kasta oo go'aan, amar, ama tilmaan oo ay qaadato HBS waa kama-dambeys. Go'aan, amar ama tilmaan uu qaatay xafiis goboleedka HBS waxaa racfaan guud looga qaadan karaa HBS. Waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda sare go'aan, amar ama tilmaan ay bixisay HBS haddii ay jirto sabab ku xadgudub sharci, ama sabab ikhtisaas, ama daacad-darro xubin ka mid ah HBS oo ka qayb qaatay go'aanka, amarka ama tilmaanta, ama dhowris la'aan xeerarka habraaca eexasho la'aanta ku qqexan faqrada (22). Ma jirto sabab kale oo racfaan looga qaadan karo go'aanka HBS. Codsiga racfaanka waa in lagu soo gudbiyo muddo lixdan maalmooda gudahood, ka dib marka la soo saaro go'aanka, amarka ama tilmaanta.

(22) Habraaca Eexasho la'aanta (Procedural Fairness).

Marka ay gudanayso hawlaheeda ku cad Sharcigan iyo Xeernidaamiyaha, HBS waa:

(a) In ay siiso ogeysiis dadka daneynaaya wixii codsi ah ee ay qabatay ama dhegeysi cabasho oo ay HBS u qaabilayso si waafaqsan Sharcigan ama Xeernidaamiyaha;

(b) In ay u socodsiiso dhageysiga la xiriira bixinta, kala-noqoshada ama hakinta Ruqsadaha markii ay jiraan marxalladaha ku tilmaaman sharcigaan ama Xeernidaamiyaha;

(c) In ay si qoraal ah u soo bandhigto sababaha go'aammadeeda, amarradeeda iso tilmaamaheeda, sababahaas oo ay bixineyso isla waqtiga go'aammada, amarrada iyo tilmaamaha; iyo

(d) Haddii go'aan, amar ama tilmaan la bixiyey dhegeysi kadib, in ay ku saleyso go'aankeeda caddeynta, mawduuca iyo akhbaarta lagu soo bandhigay dhegeysiga.

(23) Khidmad, Canshuur iyo Kharash.

Hay'adda Batroolka ee Soomaaliyeed waxay ku soorogi kartaa, si loo soo celiyo dhamaan ama qayb ka mid ah kharashaad, hadba sida ay HBS u go'aansato in ay tahay mas'uuliyaddeda ku cad Sharcigaan iyo Xeernidaamiyaha, khidmo, canshuur iyo kharash shirkad kasta oo haysata Ruqsad lugu bixiyey si waafaqsan Sharcigaan ama Xeernidaamiyaha, ayadoo diyaarineysa qaabka ay ugu sameysay xisaabinta khidamada, canshuurta iyo kharashaadka ay ku waajibaysay qofka ama shirkadda, waana in ay ku shubto lacagtaas Xisaabta Midka ah ee Maaliyadda. HBS waxay xataa si cayiman u tilmaami dulsaarka ama qaabka ay u xisaabiso dulsaarka ay bixinayso shirkadda oo la xiriira khidmad, canshuur ama kharashaad uu qofku ama shirkaddu ku bu bixin waayey wakhtigii ay waajibtay ama ka hor.

## Qodobka 14

## Dhisid Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (ShBQS)

(1) Dhismaha Shirkadda Batroolka  Qaranka Soomaaliyeed

Waxaa sharci kale lagu dhisi doonaa Shirkadda Batroolka ee Qaranka Soomaaliyeed, si shakhsi qaanuuni ah oo ay leedahay Xukuumadda Federaalka ee Somaaliya. Xarunta Shirkadda Batroolka Qaranka  Soomaaliyeed waxay ahaaneysaa Muqdisho.

(2) Hadafka Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed wuxuu ahaanayaa mid shirkad ganacsi ah oo ay Xukuumaddu koontoroolkeeda leedahay si ay uga fuliso Hawlgallo Bartool Soomaaliya. Shirkadda Batroolka ee Qaranka Soomaaliyeed waa in ay awood u leedahay isticmaalka xuquuqda ka qaybqaadashada ku xusan Qodobka 29aad.  Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay  qaadan kartaa Ruqsad si bixin toos ah ama si waafaqsan tartan ay maamulayso Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed si la mid ah habka uu Qof walba maro.

# CUTUBKA III – RUQSADAHA HAWLGALLADA BATROOLKA

## Qodobka 15

## Naqshadeyn

Si waafaqsan ujeedada Sharcigaan , Dhulka Soomaaliyeed, ama qaybo ka mid ah, waxaa loo qaybinayaa Xirmooyin (Blocks) ayada oo la raacayo hab shaxeed (grid system) waafaqsan halbeegyada iyo xeerarka caalamka laga aqoonsaday ee naqshadeynta (graticulation). Hay'adda Batroolka Soomaliyeed ayaa soo diyaarineysa naqshadeynta iyo warbixinta farsamo oo ku lifaaqan.Wasaaradda ayaa leh awoodda go'aaminta naqshadeynta, ayadoo tixgelineysa warbixinta farsamo ee HBS iyo wixii kale ee macluumaad muhiim ah.

## Qodobka 16

## Diinwaangelinta Shirkadaha Batroolka

(1) Wasaaradda ayaa sameynaysa oo xanaaneyneysa diiwaanka heshiisyada batroolka, xuquuqaha la bixiyey (concessions), leysimada iyo Ruqsadaha iyo wixii isbedel ah oo la xiriira danaha heshiis batrool, xuquuq la bixiyey, leysimo, Ruqsado ama qandaraas-hoosaad markaas jira. Diiwaanku waa in uu ahaado mid u furan dadweynaha, ayna akhbaarta ku qoran diiwaanka tahay mid caam ah haddii aan sharcigu si kale go'aamin.

(2) Heshiis kasta ee batrool iyo shati ama Ruqsad kasta waa in diinwaanka looga qoraa warqad gaar ah. Wasaaraddu waa in ay xafidaa joornaalka dokumentiyada la diiwaangalinayo.

**Qodobka 17**

**Ruqsadaha Sahanka Indha-indheynta**

(1) Awoodda Bixinta.

Hay'adda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed ayaa Qof ama Shakhsiyaad isbahaystay siin karta Ruqsad Sahan Indho-indheyn.

(2) Xuquuqaha Ruqsadda Sahan Indha-indheyn

(a) Ruqsad Sahan Indha-indheyn waxay xaq u siineysaa Qof ama isbahaysi Shaqsiyaad in ay ka sameeyaan Aag Ruqsadeysan baaritaano iyo macluumaad aalad hawada ka soo aruurisay oo la xiriira jiyooloojiyada, jiyokiimikaalka iyo jiyotiknikada dhulka.

**(b)** Ruqsadda Sahanka Indha-indheynta waxay Qofka Ruqsada la siiyay ka dalbeysaa in uu ka soo warbixiyo horumarka iyo natiijooyinka laga sugayo bidhaamiyaha, waana in uu dhowro sirta la xiriirta.

**(c)** Ruqsadda Sahanka indha-indheynta uma oggolaaneyso qofka la siiyay in uu qodo ceel, ama uu helo mudnaan ama xuquuq uu ku geli karo heshiis la xiriira Wadaag wax soosaar.

**(d)** Dhammaan xogta iyo macluumadka laga helay hawlihii la qabtay ayada oo la raacayo Ruqsadda Sahanka Indha-indheynta waa hanti Dawladeed, hase ahaatee qofka Ruqsadda wuxuu xaq u leeyahay, haddii uu la tashado HBS, in uu isticmaalo macluumaadkaas iyo akhbaartaas si waafaqsan Sharciga.

(3) Ruqsado Isdul-saaran.

Ka hor inta aan la bixin Ruqsad Sahan Indha-indheyn ku saabsan aag ay ka jirto Ruqsad, HBS waa in ay ogeysiis siiso Ruqsadda jirta.

(4) Iska-dhiibid iyo Joojin.

(a) Haystaha Ruqsad Sahan Indha-indheyn wuxuu iska dhiibi karaa waqti kasta ruqsadda isagoo ogeysiis qoraal siinaya HBS kaddib markuu fuliyo dhammaan waajibaadkii lagu heshiiyay.

(b) Haddii haystaha Ruqsad Sahan Indha-indheyn uusan gudan waajibaad laga rabay, HBS, iyadoo ogeysiin qoraal ah siineysa haystaha, waxay joojin kartaa Ruqsadda Sahanka Indha-indheynta, kaddib marka haystaha la siiyfursad maangal oo uu ku guto waajibaadkiisa.

(5) Muddada Ruqsadda Sahanka Indha-indheynta

Ayadoo la raacayo Sharcigaan, Ruqsad Sahan Indha-indheyn waxay dhaqangal ahaaneysaa labo (2) sano oo ka biliaabaneysa taariikhda la soo saaray haddii ruqsadda aan la iska dhiibin ama aan la joojin ama HBS aysan si ka duwan u sheegin. Hal sano ayaa la cusbooneysiin karaa Ruqsadda Sahanka haddii haystaha Ruqsada uu codsigiisa soo gudbiyey sagaashan maalmood (90) ka hor inta aysan dhicin muddadii hore.

## Qodobka 18

## Heshiisyada Wax soosaar Wadaagga

(1) Nooca Heshiiska Wax soosaar Wadaaga

(a) Wasaaraddu waa in ay diyaarisaa ama ay u hawgashaa sidii loo diyaarin lahaa Nooca Heshiiska Wax soosaar Wadaagga ama wixii nooc kale ee heshiis ay Wasaaraddu gali karto sida ku xusan Qodobkan.

(b) Nooca heshiiska waa in uu hagaa wada-xaajoodyada heshiis kasta lagu gelaayo sida ku sugan Qodobkan.

(2) Awoodda Bixinta.

Haya'dda Batroolka Soomaaliyeed waxay wada-xaajood Heshiis Wax soosaar Wadaag, oo la xiriira aag cayiman, la geli kartaa Qof ama Shakhsiyaad koox ah, haddii ay koox yihiina, kooxdaasi sameysatey Heshiis wada-fulin Hawl ay ansixisay HBS si waafaqsan faqrada (1) ee Qodobka 25.

(3) Habraaca Qandaraaska iyo Shuruudaha looga baahanyahay

(a) Sahanka, horumarinta iyo soosaarista Batroolka waa in lagu meelmariyo si waafaqsan shuruudaha Ruqsadda, Sharcigaan iyo sharcigii kale ee lagu dhaqangelin

(b) Ruqsadaha waxaa la bixin karaa ayadoo la raacayo habraac tartan qandaraas oo leh furfurnaan, daahfurnaan, kala-sooc la'aan oo lagu maamulaayo si waafaqsan sharciga adeegyada iyo alaab iibsiga ee Dawladda.

(c) Naadinta qandaraasku waa in uu tilmaamaa aagga Heshiiska ee ay quseyso, si faahfaahsanna u tilmaamo halbeega (criteria) bixinta lagu dhaqangelinaayo.

(d) Ruqsadaha waxaa la siin karaa oo kaliya shirkad ama koox shirkado kuwaas oo leh awoodda farsamo ee loo baahan yahay, waayo-aragnimo ku filan, taariikh hoggaansamid iyo hab-dhaqan wanaagsan, lehna awood dhaqaale oo ay si habboon ugu fulin karaan dhammaan waajibaadka ku xusan Ruqsadaha, sharciga khuseeya iyo wixii shuruudo kale ah oo ay Wasaaraddu ku xirto.

(e) Markii loo tartamo qandaraas, Xukuumaddu kuma qasbana in ay bixiso Ruqsad.

(4) Shuruudaha Dhisidda Shirkad

(a) Shakhsiga la siinaayo Ruqsad waa in uu u dhisanyahay uguna diwaan gashan yahay qaab shirkadeed Soomaaliya si waafaqsan sharciga quseeya, waana in ay mar kasta awood u leedahay maareynta Hawlaha Batroolka oo ay ka mid yihiin farsamada, hawlwadida iyo kartida maaliyadeed ee saamileyda.

(b) Qofka Ruqsadda la siiyay wat in uu xafiis ku lahaadaa Jamhuuriyadda si uu ugu fuliyo Hawlaha Batroolka, wuxuuna yeelanayaa wakiil u xilsaaran xafiiska oo leh awood buuxda oo ku hawlgeli karo, kuna geli karo asagoo wakiil ka ah qofka Ruqsadda la siiyay ballanqaadyo fulintoodu ay waajib tahay. Qofka Ruqsadda la siiyay waa in uu ka furtaa xisaab socota bangi ku yaal Soomaaliya.

(c) Shuruudaha gaarka ah oo looga baahan yahay Qofka Ruqsad la siiyay, kana midka yihiin raasumaaleyntiisa iyo maareyntiisa waxaa lagu caddeyn karaa xeernidaamiye.

(5) U Gaar ahaansho.

(a) Heshiiska Wax soosaar Wadaagga wuxuu siinayaa Qofka Ruqsadda la siiyay xaq u gaar ah oo Hawlgallo Batrool uu kaga qaban karo aagga Heshiiska, ayadoo waxba loo dhimeynin Qodobka 19 ama xaqa HBS ay u leedahay bixinta Ruqsad Sahan Indha-indheyn.

(b) Heshiiska Wax soosaar Wadaaga wuxuu ku koobnaan karaa saliidda cayriin, gaaska dabiiciga ama waxyaaba kale ee batroolka ku jira.

(c) Aagga Heshiiska billowga ee Heshiiska Wax soosaar Wadaagga waa in aysan ka badan 5000 $km^2$, haddii aysan HBS si kale oggolaan.

(6) Ogeysiiska Batroolka la Helay

(a) Qofka Ruqsadlaha ah waa in 24 saac gudahood uu HBS qoraal ku ogeysiiyaa batrool uu ka helay aagga Ruqsadda loo siiyay.

(b) Qofka Ruqsadlaha ah waa in uu siiyaa Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed macluumaadka ay ka weydiisato batroolka la helay.

(7) Barnamijyada shaqo, Qorshooyinka iyo Miisaniyadaha.

Heshiiska Wax soosaar Wadaaga wuxuu ku waajibinayaa Qofka Ruqsadlaha ah in uu u qabto Hawgallada Batroolka si waafaqsan barnaamijyada shaqo, qorshooyinka iyo miisaaniyadaha ay ansixisay HBS.

(8) Qawaaniinta ay tahay in ay ku jiraan Heshiiska Wax soosaar Wadaaga.

Heshiiska Wax soosaar Wadaagga waa in ay ka mid ahaadaan qodobada wajahaaya arrimaha soo socda:

(a) waajibaadka sameynta ugu yaraan shaqooyin ay tahay in la qabto inta lagu jiro wajiga sahanka ee waqtiga Heshiiska Wax soosaar Wadaaga.

(b) ka-tanasulka qaybo ka mid ah aagga heshiiska inta uu socdo xilliga sahminta.

(c) shuruudaha maaliyadda ee la xiriira royalts-ka (haddiiba ay jirto) iyo wadaaga Batroolka ee u dhaxeeya Ruqsadlaha iyo Xukuumadda.

(d) marka ay munaasib tahay, noocyada maaliyadeed oo aan ahayn royalts-ka Batroolka, oo ay ku jiraan xuquuqda(bonus) saxiixa iyo wax soosaarka.

(e) Qawaaniinta la xiriirta bii'ada oo loogu talogalay ilaalinta iyo dhawrista bii'ada si waafaqsan sharciga.

(f) Haddii ay munaasib tahay, waajibaadyo la xiriira siinta batrool suuqa gudaha Soomaaliya, gaar ahaan marka ay jiraan xaalado deg-deg ah.

**Qod 19**

**Ruqsadaha Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa**

(1) Awoodda Siinta

(a) Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed ayaa siin karta Qof ama Shakhsiyaad Ruqsadda Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa ee la xiriira aag cayiman.

(b) HBS ma ahan inay bixiso Ruqsadda Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa ee ku saabsan aag horay looga sameeyay Heshiis Wax soosaar Wadaag ama Ruqsad Sahan Indha-indheyn ilaa ay tixgaliso cabashooyinka ay soo gudbinayaan kuwa haysta Ruqsadaha si faragelin aan loo baahnayn loogu sameyneynin xuquuqda Ruqsadlaha kale.

(2) Xuquuqaha la bixiyay

(a) Ruqsadda Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa, inta ay dhaqangal tahay, waxay faraysaa haystaha in uu sameeyo mid ama ka badan arrimahan soo socda:

(i) in uu dhiso, ku rakibo, howlgaliyona dhismayaal, saldhig-shaqo iyo wixii qalab rakibaada; iyo

(ii) in uu ku sameeyo shaqooyin kale;

sida ku cad Ruqsadda Aagga.

(b) Ma jiraan wax u oggolaanaya Ruqsadlaha Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa in uu ka qodo ceel.

(3) Iska-dhiibid iyo Joojin

(a) Ruqsadda Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa:

(i) waxaa iska dhiibi kara Ruqsadlaha asagoo qoraal ugu gudbinaayo HBS, kaddib markii uu fuliyay waajibaadkii heshiiska.

(ii) waxaa joojin kara HBS markasta ayadoo ku ogeysiinaysa qoraal la siinaayo Ruqsadlaha haddii aanu oofin shuruudihii ku xusnaa Ruqsadda, lana siiyay fursad uu ku saxo shuruudahaas.

(b) HBS ayaa u gudbinaysa ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan iska-dhiibid ama ka-joojin Qof kasta oo Ruqsad haysta oo in ka fuliyo howlgallo Goobtiisa

Ruqsad ee loo siiyey Ruqsadda Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa Ruqsada ay quseyso.

(4) Go'aamin.

(a) Haddii Ruqsadluhu iyo milkiilaha dhulka ku xusan faqradda (1) ay heshiin waayaan, waxaa arrinta loo gudbinayaa HBS si ay go'aan uga gaarto.

(b) Waa in la tixgaliyaa magdhaw kasta oo lagama maarmaan u ah joojinta haysasho sharci ah oo waafaqsan sharci kasta oo qoran ee kale oo markaas dhaqangal ah. Khabiir ayaa go'aaminaya arrinta la xiriirta qiimaha lagu dabbaqi karo waqtiga go'aanka la gaarayo arrinta aagga ay Ruqsadu la xiriirto ayadoo la barbardhigayo dhul leh dabeecad la mid ah dhulka laga hadlayo balse aan la tixgalinayn qiimaha ku kordhay jiritaanka Batroolka dartiis.

(5) Xiriirinta Hawlgallada

HBS ayaa siin karta amar lagu hagayo xiriirinta Hawlgallada Batroolka ay kala leeyihiin Ruqsadlayaal Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa iyo Ruqsadlayda kale.

## Qodobka 20

## Naadada Codsiyada

(1) Codsiyada Ruqsadaha.

Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed ayaa dadka ugu yeeraysa in ay codsiyo ruqsadaha, ayadoo u marinaysa naado ogeysiis guud, marka ay suurtogalka tahay, taas oo noqonaysa habka la doorbiday ee lagu bixinayo ruqsadaha noocaas ah.

(2) Habraaca Qanadaraasyada iyo Shuuruudaha la xiriira.

(a) Baarista, horumarinta iyo soo saaridda Batroolka Waxa loo sameynayaa sí waafaqsan shuruudaha Ruqsada, Shacigaan, hoggaansamo shuruudah Rqusadaha, Sharcigaan iyo sharci kasta oo kale oo lagu dabbaqi karo.
(b) Ruqsada waxa la bixinayaa, ayadoo la raacayo qandaraas leh habraac furan, daahfurn, kala-sooci lahayn, kuna dhisan tartan waafaqsan shuruucda la dabbaqi karo ee nidaamiya qandaraasyada guud.
(c) Qandaraasyada la iclaamiyey ayaa qeexaya aagga heshiiska uu quseeyo, isla markaana si caddaana u tilmaamaaya halbeegga lagu bixinayo qandaraaska.
(d) Ruqsadaha waxaa la la saxiixan karaa oo kaliya shirkad ama shirkado koos ah oo leh awood farsamo, waayo-aragnimo ku filan, taariikh u hoggaansamid sharciyeed, hab-dhaqan anshax wanaagsan iyo awood maaliyadeed oo si ku filan in lagu fulin waajibaadka ka ratimaya Ruqsadaha, sharciga khuseeya iyo shuruud kasta oo kale oo ay Wasaaraddu ku xirto.
(e) Xukuumaddu kuma khasbana inay Ruqsad bixiso marka la raacayo hab qandaraas.

(3) Wada-xaajood Toos ah.

Si kasta oo ku cad Faqradda (1), HBS waxay doorbidi kartaa in ay wada-xaajood toos ah ku bixiso Ruqsado ayada oo aan soo saarin wax naado ah::

(a) marka laga hadlaayo Ruqsad Ka-hawlgalka Dhulka Dushiisa; ama
(b) marka laga halaayo dhammaan Ruqsadaha kale, haddii ay sidaas ku jirto danta guud, kaas oo ku salaysan tilmaamaha ka yimid Wasaaradda ama Xukuumadda.

(4) Haddii HBS ay Ruqsad bixiso ayada oo aan naadin oo dadka ugu yeerin in ay soo codsadaan, waa inay sababaha ay sidaas u sameysay u gudbisaa Wasaaradda iyo Xukuumadda.

(5) Codsiga waxaa lagu gudbinayaa Af Ingiriis ama Af Soomaali, waxaana lgu soo gudbinayaa boqshad xiran.

(6) Nuxurka casumaadda Codsiga.

(a) Casuumaadda naadada ah waa in lagu cayimo aagga ay khuseyso, howlaha in la qabto lagu talagalay, halbeegga shuruudaha codsiyada lagu qiimeynayo, qidmadaha laga qaadayo codsiga, haddii ay jiraan, iyo waqtiga iyo qaabka loo qiimeynaayo codsiyada la samaynayo lana tixgalinayo, ayadoo loo marayo habka furista qandaraasyada guud;
(b) Haddii casuumadda aysan ku caddayn sidaas sí ka duwan, HBS waxay dooran karta in aysan Ruqsad siin codsadayaasha midkoodna.

(7) Nuxurka Codsiga.

(a) Codsiga Ruqsadda waa in ay ku jiraan soo-jeedinno la xiriira:
   (i) sugidda caafimaadka, badbaadada iyo u daryeelka dadka ku howllan ama ay saameeyeen Howlgallada Batroolka;
   (ii) ilaalinta, degaanka, ka-hortagidda, yaraynta iyo xal u helidda wasaqeynta, iyo waxyeellada kale ee bii'ada ka soo gaarta Howlgallada Batroolka;
   (iii) tababariida iyo mudnaan-siinta muwaaddiniinta Soomaaliyeed xagga shaqo-qorista la xiriirta Howlgallada Batroolka, ayadoo ujeeddadu tahay wax ku kordhinta deegaanka;
   (iv) ballanqaadyo loogu faa'ideynayo bulshada deegaanka ee ku nool Aagga Ruqsadda iyo hoos u dhigista iyo qafiifinta saameyn kasta oo waxyeello u gaysan karta Aagga Ruqsadda oo ka yimaada Howlgallada Batroolka; iyo
   (v) ka-iibsiga badeecada iyo adeegyada Shakhsiyaad saldhigoodu yahay Soomaaliya.
(b) Ruqsad la siiyay codsade waxay ku waajabinaysaa inuu u hooggansamo ballan-qaadkiisii, sida ku xusan faqradda (7)(a).

(8) U Tixgelinta Codsiyada si la hubo.

HBS ma bixineyso Ruqsad la xiriirta Aag ilaa ay tixgalin la hubo siiso dhammaan codsiyada looga soo jawaabay, looguna hoggansamay anadada ogeysiiska.

## Qodobka 21

## Hawlgallada Batroolka Guud ahaan

(1) Galaangalka Dhinac Saddexaad.

Heshiis kasta oo Wax soosaar iyo Ruqsad Ka-hawlgal Dhulka Dushiisa waa in ay waajibiyaan in qof saddexaad galaangal u yeelan karo si ku xiran nidaam iyo shuruudo maangal ah.

(2) HBS waxa ay amri kartaa in saldhig wax soosaar oo uu leeyahay Qof Ruqsadle ah ay isticmaalaan shakhsiyaad kale, haddii ay lagama maarmaan u noqoto danaha habsami u socodka hawgallada, marka isticmaalka shakhsiyaadka kale aysan faragelin aan loo dulqaadan karin ku ahayn isticmaalka Qofka Rudsadlaha ah ama qofkii kasta oo hore u haystay xuquuq isticmaal.

(3) Ayadoo la raacayo tilmaanta ay bixisey HBS si waafaqsan faqrada (2) ee Qodobkan, Qofka Ruqsadlaha ah iyo qofka doonaaya in uu galaangal u yeesho saldhiga shaqo waa in ay heshiis galaan ku saabsan isticmaalka saldhiga shaqo waana in ay heshiiskaas u gudbiyaan HBS si ay ansixin ugu tixgeliso. HBS waxay wax ka beddeli kartaa tariifooyinka iyo qodobbada kale oo ay dhinacyadu ku heshiiyeen , ama, haddii heshiis la gaari waayey, HBS waxay u soo jeedin kartaa qodobo heshiis. Isbeddeladaas iyo heshiisyadaasi waa in ay u yeeshaan qadarin dhab ah maareyn khayraad feejigan isla markaasna u suurtageliyaan milkiilaha macaash maangal ah..

(4) Waajibaad Wadareed.

(a) haddii in ka badan hal Ruqsadle ay ku jiraan Ruqsad cayiman, waajibaadka iyo mas'uuliyadda Qofka Ruqsadlaha, ee ka dhashay Ruqsadda, waa waajibaadyo iyo mas'uuliyado ayagoo dhan dulsaaran, si wadar ah iyo si shakhsi ah.

(b) Wixii la xiriira Heshiis Wax soosaar Wadaag, Shirkadda Batroolka Varanka Soomaaliyeed iyo Shirkadda Dowlad Goboleed ee kasta, HBS waxay ka dhaafi kartaa shuruudaha ku tilmaaman xaafka (a) ee kore.

(5) Ku Xadgudubka Sharciga iyo Saameyntiisa.

Ruqsad waa wax kama jiraan ilaa bilowgii, haddii lagu helay ku-xadgudub Sharciyada Soomaaliya, oo ay ku jiraan sharciyadada lidka ku ah musuqmaasuqa.

## Qodobka 22

## Ilaalinta Bii'ada

**(1) Dhaqangelid**

Qodobkaan waxaa lagu dhaqayaa wixii la xiriira khasaare ay sababtay wasakh ka timid Saldhig-shaqo, haddii khasaaruhu ka dhaco gudaha Soomaaliya ama uu saameeyey gaadiid Soomaaliyeed ama qalab ama Saldhig-shaqo ku yaal meel dhinac-wadaag ah (adjacent).

**(2) Waajibaadka Bii'adeed.**

Shakhsiyaadka Ruqsadleyda ah ee wada Hawlgallo Batrool waxaa waajib ku ah:

(a) In ay yareeyaan khasaaraha bii'ada;

(b) In ay ka hortagaan in Batrool daato ;

(c) In ay ka hortagaan khasaaro ama fakasho ku timaada lakabyada batroolka haya;

(d) In ay ka ilaaliyaan dhulka, hawada iyo biyaha wasakh iyo haraa;

(e) In ay ka hortagaan in Batroolku ku fakado bii'ada taas oo ka imaan karta qulqul iyo daldalool aan koontorol lahayn;

(f) In ay diyaariyaan habraacyo iyo hawlgallada nadiifinta marxalladaha degdegga ah;

(g) Markii ay marxallado munaasib u ah jraan, in ay sameeyaan daraasaad bii'adeed ka hor inta aan la bilaabin Hawlgallada Batroolka, iyo daraasaadka saameynta baa'iida ee Hawlgallada Batroolka ee waa weyn; iyo

(h) In ay adeegsadaan hab-dhaqannada Caalamiga ah ee ugu wanaagsan, marka ay dib-ugu soo celinayaan bii'ada sidii ay ahayd, gabogabada Hawlgallada Batroolka kadib.

(3) Mas'uuliyadda waxyeelada Wasakhda

(a) Qofka Ruqsadlaha ahi wuxuu mas'uul ka yahay khasaaraha wasakhda ayadoo aan loo eegeyn in ay khaladkiisa tahay;

(b) Shakhsiyaadka Ruqsadleyda ahi waxay wadar ahaan iyo shakhsi ahaan mas'uul ugu yihiin khasaaraha wasakhda. Qaanuunkaan waxaa la dhaqangelinayaa markasta oo Ruqsad loo isticmaalo si wadar ah.

(c) Qofka Ruqsadlaha ahi waa in uu abuuraa sanduuqa khasaaraha wasakhda si loogu nadiifiyo oo dib loogu soo nooleeyo goobta wasakhdu khasaaraha u geysatay;

(d) Haddii khasaaraha wasakhdu uu dhacay wakhti lagu gudo jiray hawlo batrool hawshuna ay ahayd mid la galay Ruqsad la'aan, dhinaca waday hawlaha batroolka wuxuu mas'uul ka yahay khasaaraha, ayada oo aan loo eegeyn in ay khaladkiisa tahay. Mas'uuliyadaas oo kale waxay dulsaaran tahay shakhsiyaadka kale ee ka qayb qaatey hawlaha batroolka.

(4) Dacwado La Xiriira Khasaare Wasakheyn.

(a) Haddii, ayadoo la wado Hawlgallo Batrool, khasaare wasakh ay sameysay qof aan ahayn Qof Ruqsadle ah, Qofka Ruqsadda haysta wuxuu ku dacweyn karaa dhinaca kale kaliya marka ay jirto dayacaad weyn ama dhaqan xumo ku talo gal ah ama haddii ay wasakhdu ka timid weerar ku-tala gal ah. Isla masuu'liyaddaas waxaa qaadaya kuwa kale oo ka qayb qaatay hawlaha Batroolka.

(b) Qofka Ruqsadlaha ahi waa in uu si aan daahid lahayn, usoo gudbiyaa macluumaadka ku saabsan cinwaanka dhinaca lagu soo hagaajinaayo dacwooyinka magdhawga la xiriira khasaaraha wakheynta. Macluumaadkaas waa in lagu faafiyaa ogeysiis guud oo ku soo baxaaya Faafinta Rasmiga ama aaladahii kale eek u haboon, oo ay ku jiraan saxaafadda daabacan iyo midda elektorooniga ah.

**(c)** Dacwada magdhawga ee la xiriirta khasaaraha wasakheynta waa in la horgeeyo Maxkamadda qaabilsan meesha wasakheyntu ka dhacday ama meesha ay wasakheynta khasaraha ka sababtay.

**Qodobka 23**

**Soo celin iyo Magdhaw**

(1) Shuruudaha Ruqsadda

Qofna kama qaban karo Hawlgallo Batrool Dhulka Soomaaliya haddii uusan haysan Ruqsad lagu bixiyay Sharcigan ama Xeernidaamiyaha.

(2) Soo celin.

Ayadoo aysan meesha ka baxayn mas'uuliyadda ciqaabeed ee Qofkaas, Qofka ku mashquulsan Hawlgallo Batrool ka duwan kuwa Ruqsad la xiriira waa in:

(a) U soo celiyaa Somaaliya caddad u dhigma qiimaha suuqa ee Batroolka uu horumariyay, soo saaray ama uu dhoofiyay, oo ay la socoto dulsaarka ku bislaaday dib u dhaca bixinta lacagta oo aan ka badneyn caddadka sharciga ah ee dulsaarka oo ay go'aaminayso Wasaaraddu.

(b) La gala wareego dhammaan kaabayaasha iyo qalabka loo adeegsaday Hawlagalladaas Batrool, ama meesha ka qaadaa kaabayaashaas iyo qalabkaas, ama mas'uul ka noqdaa bixinta qarashka ku baxaya qaadistaas.

(c) uu nadiifiyaa wasakhda ka dhalatay Hawlgallada Batroolka, ama uu dib ugu celiyaa Soomaaliya karashka nadiifinta.

(3) Caddadka Magdhowga

Mas'uuliyaadka ku xusan faqradda (1) ayaa ayaga oo isku duuban la dabbaqaya, ama la kala qaadayaa, taasoo ku xiran hadba sida ay HBS u aragto inay habboontahay, ayada oo ujeeddadu tahay in la gaarsiiyo Soomaaliya meesha ay joogi lahayd haddii aan Howlgallada Batroolka ee la qabtay aan loo marin jid aan ka ahan Ruqsad.

(4) Mas'uuliyad wadareed iyo mid shakhsiyeed.

Mas'uuliyadaha ku tilmaaman faqradda (1) waxaa loo dhaqangelinayaa si wadajir ah, ama aan ahayn, hadba sidii ay HBS u cayinto munaasib in ay tahay,hadafkuna yahay in hantida Soomaaliya lugu soo celiyo meeshii ay ahaan lahayd haddii aysan ahaan lahayn Hawlgallada Batrool ee lagu qabtay si ka duwan si Ruqsad ah.

**Qodobka 24**

**Xaddidaadda Adeegsiga Xuquuqda**

(1) Magdhaw Caddaalad ku dhisan ee Milkiilayaasha dhulka.

(a) Qof Ruqsadle ah ma isticmaalaayo wixii xuquuq ah oo ka dhashay Ruqsad ma Sharcigaan:

(i) hanti kasta oo maguurto dawladeed ah haddii uusan oggolaansho ka haysan HBS;

(ii) hanti kasta oo maguurto gaar ahaaneed ah ee Xukuumadeed haddii uusan oggolaansho ka haysan HBS;

(iii) Hanti kasta oo maguurto gaar ahaaneed;

haddii uusan siin milkiilaha magdhaw caddaalad ku dhisan oo maangal ah, taasoo ku xiran sida ay HBS u go'aamiso.

(b) Milkiilaha hanti kasta oo maguurto ah oo ku taal aag Ruqsad laga bixiyay wuxuu haysanayaa xuquuqda adeegsiga dhulkiisa haddii adeegsiga dhulkaas uusan faragelineyn Hawlgallo Batrool.

(c) Milkiilaha dhul ama qofka si sharciga waafaqsan u deggan dhul ku yaal aag Ruqsad lagu dhiibay wuxuu haysanayaa xaqa in uu xoolahiisa daaqsiiyo ama beerto dusha sare ee dhulka haddii daaqsiintaas ama beerashadaas aysan faragelineynin Hawlgallada Batrool.

(d) Ruqsad ayaa xaddidi karta ama si kale u xakamayn karta sida uu Qofka Ruqsadda haysta u adeegsanaayo kaabayaasha dawladda iyo intifaacsiga kheyraadka kale ee dabiiciga ah, oo ay ku jiraan geedaha, ciidda, quruuruxa, biyaha, xoolaha, shimbiraha iyo kalluunka.

(e) Ruqsaddu meesha kama saarayso waajibaadka in la helo oggolaanshaha hay'adaha mas'uulka ah, haddii aan si cad Ruqsadda loo caddeynin.

(2) Faragalin-la'aanta Howlaha Sharciga ah ee Xeebta Ka Baxsan

Qofka Ruqsadda haysta ma adeegsan karo xaq kasta oo ku xusan Ruqsadda ama Sharcigaan ama Xeerarka oo faragalin ku samaynaysa kalluumaysiga, badmaaxidda ama hawlgal kale ee kasta oo si sharciga waafaqsanlooga fulinaayo goob xeebta ka baxsan ayada oo aan laga haysan oggolaasho qoraal ah hay'adda mas'uulka ah.

(3) Magdhawga ka dhasha Qashqashaad

(a) Qofka Ruqsadda haysta ayaa mas'uul ka ah bixinta magdhaw maangal ah oo ay go'aamiso HBS haddii inta lagu gudjiro Howlgallada Batroolka uu:

(i) qashqashaad ku sameeyo xuquuqda milkiilaha hanti maguurto ah, ama uu halkaas waxyeello gaarsiyo; ama

(ii) faragalin muuqata ku sameeyo kalluumaysiga, badmaaxidda ama hawlo kasta ee kale oo sharciga waafaqsan.

(b) Haddii qiimaha mid kasta oo ka mid ah xuquuq ay kor u kacdo Hawlgallada Batroolka awgeed, magdhawga laga bixin karo xuquuqdaas kama badan karaan qaddarka la bixin lahaa haddii qiimaha uusan sidaas u kacin.

(4) Magdhaw Caddaalad ku Dhisan oo Mangal ah

(a) HBS ayaa go’aaminaysa waxa uu noqonayo magdhawga caddaaladda ku dhisan oo maangalka ah ee ku xusan Qodobka 30aad, kaddib marka ay tixgaliso wakiillada dhinacyada danaynaya.

(b) Haddii Qofka Ruqsadda haysta uu bixin waayo magdhawga laga dalbay ayadoo la raacayo faqradda (2), ama uu milkiilahu ama haystahu uu ku qanci waayo qaddarka magdhawga loo soo jeediyay, milkiilaha ama haystaha ayaa dacwo oogi kara maxkamadda degaanka ee awoodda u leh go’aan ka gaarista iyo hanashada magdhawga (haddiiba uu jiro) ay u badantahay in la bixiyo ayadoo la raacayo faqraddan, soddon (30) cisho gudahood ee ka billaabanaysa taariikhda la sameeyay dalabka magdhawga ama la soo jeediyay magdhawga.

## Qodobka 25

## Ansiximaha HBS

(1) Ansixinta Heshiisyada.

Heshiisyada Wada Hawlgalka (Joint Operating Agreement), qaabka iyo isku dheellitirka culeyska waxyaabaha kor loo qaadayo iyo heshiisyada la xiriira Hawlgallada Batroolka, iyo weliba wax-ka-beddel kasta oo lagu sameeyo heshiisyadaas, waa inay ahaadaan kuwo ay horey u u ansixisay HBS. HBS waxay ansixinaysaa heshiisyadaas ama wax-ka-beddellidaas, haddii ay waafaqsan yihiin Ruqsadaha, Sharciga iyo Xeernidaamiyaha.

(2) Ansixinta Isbeddellada Kontoroolka (Shirkadda).

(a) Dhammaan isbedellada la xiriira kontoroolka Qof Ruqsadle ah , waa in ay marka hore ansixisaa HBS.

(b) Haddii isbeddel lagu sameeyo kontoroolka Qof Ruqsadle ah ka hor ansixinta HBS, HBS waxa ay soo afjari kartaa Ruqsada ay quseyso.

(c) Sida ujeedada faqradda 2(b), isbeddel koontorool waxaa mid ah Qof joojiyey in uu kontoroolka hayo (ha ahaato ama yeysan ahaan in Qof kale noqdo kontorool haye) iyo Qof helay kontoroolka (ha ahaato ama yeysan ahaan in Qof kale kontoroolka hayey).

(3) Ansixinta Wareejinta.

Marka laga reebo in ay jirto oggolaansho hore oo qoraala ah ee HBS,(ogolaanshahaas oo HBS aysan si sabab la'aan u haysan Karin ama ula daahi karin), ama aysan si qayaxan ugu tilmaaneyn Ruqsada muuqan qodobbada Ruqsada mooyee, ma jiraan wax siismo, wareejin, gudbin, cusboonaysiin, mideyn (isku dar), culeys ama mucaamilo la mid ah oo dhaqangal ama mira-dhal noqonaya ee la xiriira Ruqsad. Xeerhoosaadyada ayaa qeexaya cabbirka ay HBS ku qiimeyneyso habboonaansha oggolaanshaheeda.

(4) Codsiga Wareejinta.

Codsiga oggolaanshaha wareejinta ee ku xusan Qodobkaan waa in loo qoro HBS, waana in lagu lifaaqo:

(a) Caddayn ah in loo-wareejiyaha ruqsada uu karo in uu guto waajibaadka wareejiyaha Ruqsada;

(b) caddaynta dhismaha shirkadda iyo in loo-wareejiyuhu u hoggaansamayo;

(c) heshiiska wareejinta ee dhexmaray loo-wareegaha iyo wareejiyaha;

(d) caddaynta in aan cashuur lagu lahayn ee ka soo baxday Wasaaradda Maaliyadda;

(e) ballan-qaadka daacadnimo ee loo-wareejiyaha;

(f) faahfaahinta aqoonta farsamo iyo xirfo ee loo-wareejiyaha iyo shaqaalihiisa;

(g) faahfaahinta maaliyadeed uu haysto loo-wareejiyaha, oo ay ku jiraan wixii raasumaal, tas-hiilaad amah, iyo wixii damaanad ee la hayo;

(h) faahfaahinta wixii farsamo iyo qalan ee uu codsaduhu haysto;

(i) wixii soo-jeedin ah ee la xiriira qoris iyo tababar shaqaale Soomaali ah;

(j) arrin kastoo kale oo ay HBS u aragto lagama maarmaan.

(5) Sii-socoshada Hawlgallada.

Qofka wareejinata dan uu ku leeyahay Ruqsad waa in uu xaqiijiyo sii-socoshada Hawgallada Batroolka ee la xiriira Ruqsada ilaa hawgalladaas uu kala wareegato loo-wareejiyaha.

(6) Warbinta Maaliyadeed ee Sannadka

Qof kasta oo ka howlan Hawlgallada Batroolka waa in ay HBS soo hor-dhigto, sanad kasta, caddeymaheeda maaliyadeed ee la soo baaray iyo weliba caddeymaha maaliyadeed ee shirkadda ay ku abtirsato iyo kuwa maalgeliyaasheeda.

**Qodobka 26**

**Heshiiska Mideynta**

(1) Mideynta.

(a) Haddii iyo markii la helo Keyd (Reservoir) batrool ceelaala qayb ahaan aag uu ka jiro heshiis, qaybna aag ee uu ka jiro heshiis kale:

I. HBS waxa ay Dadka haysta Ruqsada ka dalabto, ayada oo gaarsiineysa ogeysiis qoraal ah, in ay wada galaan Heshiis Mideyn, sí loo xaqiijiyo in batroolka laga soo saarayo uu noqdo mid aad wax ku ool ah wanaagsanna; iyo

II. Haddii aan wax heshiis ah la gaarin, (18) siddeed iyo toban bilood gudahood laga bilaabo marka la helo ogeysiiska qoraalka ee ku xusan xarafka (i) ee faqraddan, HBS ayaa goáan ka gaareysa Heshiiska Mideynta.

(b) Haddii iyo goortii la helo (ifbixiyo) Keyd batrool ee ceelaala qayb ahaan aag uu ka jiro Heshiis, qayb ahaanna Aag ka baxsan midka uu ka jiro Heshiis Wadaag Wax-soo-saar:

I. HBS waxa ay dadka Ruqsada haysta ka dalbeysaa, ayadoo gaarsiineysa ogeysiis qoraal ah, in ay HBS la galaan Heshiis Wadaag Wax-soo-saar sí loo xaqiijiyo in Batroolka laga soo saarayo Keydkaas uu noqdo mid aad wax ku ool ah, tayo ahaana wanaagsan; iyo

II. Haddii aan wax heshiis ah la gaarin siddeed iyo toban bilood gudahood (18) laga bilaabo marka la helo ogeysiiska qoraalka ee ku xusan xarafka (i) ee hore, HBS ayaa goáan ka gaareysa heshiiska mideynta, haddii sidaas wax ka duwan aan lagu qorin Heshiiska Wadaagga Wax soosaar Wadaagga.

(2) Heshiiska Mideynta.

Ayada oo aan la koobin arrimaha looga hadlayo, heshiiska mideynta waa in uu qeexo tirada batroolka ku jira aag kasta uu ku saabsan yahay heshiiska mideynta, wuxuuna magacaabaya qof ka shaqeeya oo mas'uulka noqda soo saaridda batroolka heshiiska mideyntu ku saabsan yahay.

(3) Shuruudda Ansixinta.

HBS waxay oggolaaneysaa sii ambaqaadka hawlaha soo saaridda keyd batrool ee ku jira aag heshiis ka jiro, sida ku tilmaaman faqradda (2), kaliya ka dib marka la oggolaado ama goáan laga gaaro heshiiska mideynta.

(4) Ansixita wax-ka-beddelaadda.

Wax-ka-beddel kasta ee lagu sameynayo heshiiska mideynta waxa uu ku xiran yahay in hore loo haysto oggolaanshaha HBS.

## Qodobka 27

## Xallinta Khilaafaadka

(1) Kaalinta HBS ee Xallinta Khilaafaadka.

(a) waxay u kuurgeli kartaa ayna go’aan ka gaari kartaa khilaafaadka u dhexeeya shakhsi ka qayb ah hawlgalo sahmin ama horumar, ha ahaato khilaafaad dhexdeeda ah ama khilaafaad u dhexeeya ayada iyo dhinac seddexaad oo aan Dowladda ahayn, kuna lug leh

(i) xuduudaha aag sahmin ama aag horumarin;

(ii) ficil kasta oo lugu dhaqaaqay ama laga baaqsaday ku dhaqaaqiddiisa, ama loo malaynayo in lugu dhaqaaqay ama loo maleynayo in laga baaqsaday fulintiisa, ama caawiye u ah, hawlaha sahminta ama horumarinta;

(iii) qiimaynta iyo bixinta magdhaw si waafaqsan Sharcigaan; ama

(iv) wixii kale oo ah arrimo la xiriira hawlgalada sahminta iyo horumarinta.

(a) HBS waa ay diidi kartaa in ay go’aan ka gaarto khilaafaad kasta oo la horkeeno, haddii ay sidaas yeeshana, waa in ay wargelin qoraal ah siiso dhinacyada khilaafaadku dhexyaal.

(b) ) HBS, ayadoo tixgelin siineysa guud ahaan macluumaadka muhiimka ah, waxay bixin kartaa tilmaan ujeedkeedu muhiim u yahay fulinta go’aamadeeda ku saleysan Qodobkaan 28, ayna ku jiri karto amar lacag bixin lugu amray dhinac ka mid ah khilaafka oo loo amray dhinac kale oo ka mid ah ah khilaafka, si isku-dheelitiran oo macquul ahaan karta.

(2) Khilaafyada la xiriira Ruqsadaha.

(a) Haddii Rukhsadlaha iyo HBS isku khilaafaan fasiraadda ama dhaqangelinta qodobo Ruqsadda ku tilmaaman, dhinacyadu waa in ay isku dayaan wadahadal in lugu xalliyo khilaafka.

(b) Haddii khilaafka lugu xallin waayo wadahadal saaxiibtinimo, dhinac kasta wuxuu horgeyn karaa Garqaade Caalami ah (international arbitration) oo hore la iskugu waafaqay, fadhigiisuna dhexdhexad yahay, ama Maxkamadda Sare, hadba sida ay doorato dhinaca dacwada soo gudbiyey

(3) Fulin.

(a) HBS waxay u gudbin kartaa nuqul, horteeda lagu xaqiijiyey, amar ama dikreeto kasta oo ka soo baxday HBS, Maxkamadda qaabilsan deegaanka uu ka hawlgalo shakhsiga amarka ama dikreetadu quseyso. Maxkamadda madaniga ahi, haddii aan racfaan jirin, waxay fulineysaa dikreetada ama amarka HBS si u dhiganta sida ay u fuliso dikreetooyinkeeda iyo amarradeeda.

(b) Khidmooyinka ku waajibay fulinta dikreetada ama amarka HBS waa kuwa ku waajiban fulinta kuwa la mid ah dikreto ama amar ay soo

saartey Maxkamadda wax fulineysa.

(4) Xeedrarka Habraaca.

HBS waxay sameyn kartaa xeerar ku saabsan bilowga iyo socodsiinta dacwadaha qodobkaan ku tilmaaman waxayna xafideysaa buugga iyo qoraalada caddeynta u ah wixii la xiriira dacwooyinkaas.

**Qodobka 28**

**Ka-dhaafid ama Wax Ka-beddelid Shuruudo**

HBS waxay ka dhaafi kartaa Shakhsi Rukhsadle ah waajibaadkiisa u hogaansanaanta shuruudaha ku cayiman rukhsadda, waxay kale oo ogalaan kartaa in ay wax ka bedesho ama hakiso shuruudaha rukhsadda, si shuruudeysan ama shuruud la'aan ah, si ku meel gaar ah ama si joogto ah, ayadoo siineysa Wasaaradda qoraal ay ku caddeynayso sababaha ay sidaas u yeeshay. Qodobkaan 28aad ma bixinaayo awood lugu saamaxayo ama lugu hakinaayo bixinta lacag rukhsaddu waajibisay.

**Qodobka 29**

**Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed iyo Ka Qaybqaadasha Xukuumadda ee Hawlgallada Batroolka**

(1) ShBQS iyo ka qayb-qaadashada Hawlgallada Batroolaka ee Xukuumadda Soomalaiya

Heshiis Wax soosaar Wadaag ee kastaa waa in uu go'aamiyaa:

(a) in ShBQS ay xaq u leedahay in ay ka qayb qaadato Hawlgalada Batroolka, ilaa ugu badnaan 20% oo saami ah; iyo

(b) in Shirkadda Batroolka ee Dowlad Goboleedka ee Aagga Rukhsadeysani ku yaal ay xaq u leedahay in ay ka qayb qaadato Howlgalada Batroolka, ilaa ugu badnaan 10%.

(2) Go'aan Ka-qaybqaadasho.

Go'aanka ShBQS ee ka qayb qaadashada Hawlgalada Batroolka ee Heshiis Wax soosaar Wadaag waxaa sameynaaya Golaha Wasiirada, kadib markii uu dhegeysto daraasaadka iyo warbixinta ShBQS ay Wasiirka usoo gudbisay. Go'aanka ka qayb qaadashada Shirkadda Dowlad Goboleedka waxaa sameynaya Dowlad Goboleedka xubinta ka ah Jamhuuiriyada Federalka Soomaaliya oo uu ku yaalo dhulkeeda Aaga Rukhsadeysan.

(3) Wakhtiga Go'aanka.

Xuquuqda ka qayb qaadashada ku tilmaaman Faqradda (1) waxaa la isticmaali karaa waji kasta oo ay marayaan Hawlgalada Batroolka si waafaqsan qodobada iyo shuruudaha ku dhigan Heshiiska Wax soosaar Wadaagga.

## Qodobka 30

## Xuquuqda Iibka Hore

(1) Haddii Shakhsi Rukhsadle ahi go'aansado in uu iska wareejiyo kulli ama qayb ka mid ah saamiga uu ku leeyahay Rukhsadda, SHBQS waxay xaq u leedahay in ay kula wareegto qiimaha saamiluhu kula soo heshiiyey iibsade diyaar ah.
(2) Haddii heshiisku uusan ku saleysneyn qiimo lacageed, SHBQS waxay xaq u leedahay in ay bixiso qiime lacageed oo u dhigma qiimaha waxa lugu heshiiyey.

(3) Xuquuqda SHBQS ee iibka hore waa tirtirmaysaa haddii aysan ka faa'iideysan 60 maalmood gudohood oo ka bilaamaya markii ay heshay ogeysiiska iibka.

# CUTUBKA IV – HAGIDDA HAWLGALLADA BATROOLKA

## Qodobka 31

## Hab-dhaqannada Shamo

(1) Hab-dhaqanka Caalamiga ee ugu wanaagsan.

Socodsiinta Hawlgalada Batroolku waa in ay tahay mid raacsan Hab-dhaqanka Caalamiga ee ugu wanaagsan ee ah hab-dhaqannada iyo hab-raacyada ay dadka feejigan ee taxaddiraya u adeegsadaan Hawlgallada Batroolka guud ahaan caalamka, marka ay ku sugan yihiin xaalado iyo duruufo la mid ah kuwa hore loo soo marey oo la xiriira marxalad ama marxalado muhiim ah ee Hawgallada Batroolka, gaar ahaan kuwa xaqiijinaya:

(a) ilaalinta wixii khayraad Batrool ah oo loola jeedo adeegsiga habab iyo habraacyo suurageliya in la soo saaro tirada ugu badan ee Batrool oo farsamo ahaan iyo dhaqaale ahaan meel-mar noqon karta iyo in laga taxaddiro hoos-u-dhac ku yimaada keydka batrool ayada oo la adeegsanayo mabaadída sare u-qaadidda wax soosaarka iyo mabaadída kale ee ilaalinta iyo hoos u-dhigidda wixii batrool ah ee ku lumaya dhulka dushiisa;

(b) badqabka hawlgallada, waa adeegsiga habab iyo habraacyo dhiirrigelinayo badbaadada shaqaalaha iyo ka hor-tagga wixii shilal ah;

(c) ilaalin bii'adeed, ee ku baaqaysa yagleelidda habab iyo habraacyo ee yareynaya saameynta ay Hawlgallada Batrool ku leeyihiin bii'ada;

(2) Xafidaad

Soo saaridda Batroolka waa in ay ku timaado:

(a) sida ugu habboon ee suuragelineysa in la soo saaro batroolka ugu badan ee ku jira keyd weliba gaar ahaantiis, ama dhowr keyd isku darkooda;

(b) sí waafaqsan habdhaqanka caalamiga ee ugu wanaagsan, iyo mabaadída dhaqaale ee salka leh; iyo

(c) sí looga hortagayo wixii lumin kara batrool ama tamar keyd ah.

(3) Qiimeyn Joogto ah.

Qofka Rukhsadlaha ahi waa inuu si joogta ah u sameeyaa qiimeynta istaratejiyada wax soosaarka iyo farsamada wax xallinta, waa in uu ku dhaqaaqo talaabooyinka muhiimka ah ee sidaas lagu gaari karo, waana in uu ku wargeliyaa HBS isbedel kasta oo muhiim ah, si waafaqsan habdhaqanka wanaagsan ee caalamka.

**Qodobka 32**

**Furfuridda (Decommissioning)**

(1) Qorshaha furfuridda.

(a) Qof Ruqsad haysta, ee leh ama ku shaqeeya Saldhig-shaqo Batrool, waa in uu Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed u gudbiyo qorshaha Furfuridda Saldhiga-shaqo , oo ay ku jiraan ceelasha, ka hor inta aysan dhicin ama aysan dhammaan muddada Ruqsada ama ka hor inta uusan si abadi ah u dhammaan isticmaalka saldhiga-shaqo.

(b) Qorshaha Furfuridda waa in ay ku jirto soo jeedin faahfaahsan ee ku saabsan doorbididda ugu yaraan mid ka mida waxyaabaha soo socda:

(i) saldhigga oo loo sii-isticmaalo Hawlgallada Batroolka;

(ii) soo afjaridda Hawlgallada Batroolka iyo saldgigyada shaqo oo loo sii-isticmaalo hawlo kale; ama

(iii) soo-afjaridda Hawlgallada Batroolka iyo saldhigyada shaqo oo meesha laga qaado.

(c) Qorshaha furfuridda waxaa ku jiri kara soo-jeedimo kala duwan ee khuseeya qaybo kala duwan ee saldhigyada shaqo ama saldhigyada kala duwan oo qorshuhu koobay.

(d) Qorshaha furfuridda waa in ay ku jiraan macluumaadka iyo qiimeynta lagama maarmaanka u ah Wasaarada si ay u qaadato go'aan la xiriira joojinta, oo ay ku jirto macluumaad ku saabsan wixii qiime ah iyo lacago, nidaam maareyn, kala door-bididda joojinta iyo saameynta xagga bii'ada iyo bulshada oo qiimeynta kala doorashooyinka oo loo sameeyey loona oggolaaday si waafaqsan Sharcigan.

(e) Qorshaha soo-afjaridda Hawlgallada Batroolka iyadaoo la raacayo faqradda (1)(b) ama (iii) ee Qodobkan waa in ay ku jirto soo-jeedin faahfaahsan ee ku soo celinta dhulka sidii uu markii hore ahaa iyo maareynta wixii wasakh ah, taas oo ay ku jirto suulinta sababaha wixii khasaare iyo khatar ku ah bii'ada iyo bulshada halkaas ku nool.

(f) Haddii Wasaaraddu aysan goyn wax ka duwan, qorshaha Furfuridda waa in la gudbiyo isla waqtiga la gudbinayo Qorshaha horumarinta (hawlaha gogolxaarka).

(g) Wasaaradda waa in si degdegsiimo leh loogu wageliyo, haddii la filaayo in isticmaalka saldhidyada batroolka idlaanayo ka hor inta aysan dhammaan muddada Ruqsada. Qorshaha Furfuridda waa in la diyaariyo, loo gudbiyo sida ugu dhaqsiyaha badan, Wasaaradduna waxay waqti u xadadi kartaa soo gudbinta qorshaha. Sidaas oo kale haddii Ruqsada la joojiyo muddada dhammaadkeeda ka hor.

(h) Wasaaraddu waxa ay qorshaha furfuridda ku shaacinaysaa Faafinta Rasmiga iyo warbaahin kale ee ku habboon, si loo xaqiijiyo in dadka daneynaya loo wargeliyo, fursadna loo siiyo in ay aragtidooda ka dhiibtaan, dib-u-furfuridda waqti aan ka yareen sagaashan (90) maalmood ee ka bilaabata taariikh shaacinta.

(2) Go’aanka Joojinta Hawlgallada Batroolka.

(a) Wasaaradda waxa ay soo saaraysaa go’aan ay ku joojineyso isticmaalka saldhigyada shaqo batrool qaybta ka ah qorshaha Furfuridda, waxana waqti u xadadaysaa hirgelinta go’aanka.

(b) Wasaaradu waxay wada-tashi la yeelanaysaa Wasaaradaha iyo hay’adaha kale ee ku shaqada leh ka hor inta aan la soo saarin go’aanka joojinta. shaqsiyaadka daneynaaya iyo shaqsiyaadka ay suurtagalka tahay in saameyso joojinta waa in fursad loo siiyo in ay ra’yigooda u soo bandhigaan Wasaaradda ka hor inta aan la qaadan go’aanka joojinta.

(c) Marka go’aanka ay qaadanayso, Wasaaraddu waa in ay tixgeliso dhammaan danleyda ay khuseeysa, oo ay ka mid tahay saameynta go’aanka ay ku yeelan karo mujtamacyada, beeraha iyo dhamaan danleyda kale oo ay saameynta ku yeelaneyso oo ay sababi karto joojinta xag bii’ada, ammaanka, dhan farsamo iyo dhaqaale.

(d) Wasaaraddu waxay dejin kartaa shuruudo khaas ah oo la xirira go’aanka joojinta.

(e) Qofka ruqsada haysta waxa uu xaqiijinayaa in go’aanka loo fuliyo si waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha ku xusan isla go’aankaas isla mar ahaantaana waa in ay Wasaaradda u gudbiso warbixin ku saabsan hawlaha ay qabatay.

(f) Haddii go’aanku sheegayo in Saldhigyada Shaqo Batrool loo sii-isticmaali karo Hawlgallada Batroolka, Qofka Ruqsada haysta waxaa laga doonayaa in uu soo bandhigo qorshe furufurid cusub, ka hor inta aan la isticmaalin Saldhigyada Batrool, waana in uu u hoggaansamo qodobbada Cutubkan.

(g) Go’aanka joojinta iyo iyo waajibaad kasta ee uu go’aanka joojinta saarayo Qofka Ruqsada haysta waa ka jiritaan dambeynayaan dhicidda iyo dhammaadka Ruqsada laga hadlaayo.

(3) Sanduuqa dhaqaalaha Furfuridda.

Qofka Ruqsada haysta waa in uu sameyaa sanduuq dhaqaale Furfuridda, wax yar ka dib marka la oggolaado qorshaha soo saaridda iyo hawlgalka ama bixinta Ruqsada loo qaato nidaamka daabulaadda, sida ku qoran Xeernidaamiyayaasha. Sanduuqa dhaqaalaha Furfuridda waa in uu ahaado mid ku filan in uu daboolo kharashka furfuridda ee buuxa.

(4) Owdid iyo ka Guurid Ceelasha.

(a) Qofka Quqsada haysta waa inuu dhaqso Wasaaradda ugu gudbiyaa go'aan kasta ee la xiriira Ceel laga guurayo.

(b) Ka guuris iyo Gufeyn ceel waxaa kaliya oo lagu sameyn karaa oggolaansho hore ee Wasaaradda, waana in loo sameeyo habka ay jideysey Wasaaraddu.

(c) Qofka Ruqsadda haysta waa in uu u kuurgalaa owdidda iyo ka guurista ceelasha sida ay qorayaan Xeer-Nidaamiyaalku.

(5) Dhulka oo siduu ahaa lagu soo celsho.

Ka dib marka ay Hawlgallo Batrool ka dhammaadaan aag, Qofka Ruqsadda haysta ee ka shaqeeya saldhigyada waxyeelleeyey aagga waa in uu aagagga ay hawlgalladu saameyntu ku yeesheen ku soo celiyo sidii ay ahaayeen bilowga Hawlgallada, suuliyana wixii khasaare iyo khatar ku ah bii'ada iyo bulshada deriska la ah.

(6) Shaqada iyo Mas'uuliyada Furfuridda.

a. Haddii qofka Ruqsadda haysta uu bixiyo ama gudbiyo saamigiisa ka-qaybgal danaha ku xiran Ruqsada gebi ahaan ama qayb ahaan kan wareejinaya iyo kan la wareegaya waxay si wadajir ah u qaadayaan waajibaadka maaliyadeed iyo kharashka lagu fuliyey go'aanka soo-afjaridda.

b. Waajibka maaliyadeed ee qofka wareejiyaha ah waa in lagu xadido kharashka la xiriira saldhigga, oo ay ku jiraan ceelasha jiray markii ay dhacaysey wareejinta, ayada oo xisaabta lagu saleynayo xajmiga danaha ka-qaybgal ee la wareejiyey.

(7) Ku-guuldarreysiga Fulinta Hawlaha Furfuridda.

Haddii aan la soo gudbin wax qorshe Furfurid ah ama aan go'aanka joojinta la fulin waqtigii loo xadiday gudahiisa ama aan loo fulin si waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha go'aanka la gaaray ee ku xusan faqradda (2) ee Qodobka 33 ee Sharcigan, Wasaaraddu waxa qaadi kartaa tillaabooyinka lagama maarmaan ah ayada oo matalaysa shaqsiyaadka Ruqsada haysta ee mas'uulka ka ah joojinta, oo ay ku jirto hawlgelinta qandaraas-hooslayaal si loo fuliyo go'aanka joojinta, ayada oo uu Qofka Ruqsada haysto qaadayo wixii kharash iyo khatar ah. Wassiirka wuxuu ujeeddadaas u isticmaali karaa sanduuqa dhaqaalaha furfurida. Wasiirku waa in uu, waqti macquula gudihiis, ku bixiyaa ogeysiis ku saabsan doonista uu doonayo in uu qaado tillaabooyinka ku xusan faqraddan, waana inuu Qofka Ruqsada haysta siiyo waqti macquula ee uu ku xaliyo ee uu kaga gaashaamanayo.

(8) Mas'uuliyad Magdhow.

Qof Ruqsad haysta ee uu saaran yahay waajib la xiriira fulin go'aan joojin, wuxuu u qoolan yahay in uu Xukuumadda u magdhabo wixii khasaare iyo adduun ka luma cid kasta oo ay sameysay, xagga wixii la xiriira furfuridda saldhigga ama wixii kale ee fulinta go'aanka ah.

## CUTUBKA V - MACLUUMAAD IYO BAARITAAN

### Article 33

### Xog (data) iyo Macluumaad

(1) Lahaanshaha Xogta(data)  iyo Macluumaadka.

Soomaaliya ayaa lahaanaysa dhammaan xogta (data) iyo macluumaadka, ha ahaato mid aan fasirneyn, mid la soo dhiraandhiriyey, laga soo shaqeeyey (processed), la soo fasiray ama la soo falanqeeyey, oo laga helay Ruqsad kasta. Wixii waajibaad xog-ilaalin ah waa la dhaqan gelinayaa, sida ku tilmaaman faqrada (2) ee Qodobka 12 iyo faqradda (9) ee Qodobka 13.

(2) Dhoofinta Xogta.(data)

Dadka Ruqsada haysta waxa ay dibedda u dhoofin karaan wixii xog iyo macluumaad ah, oo la helay intii ay socdeen Hawlgallo Batrool, waxayse HBS ay dalban kartaa in nuqul asal ah, ama haddii ay tahay dhagax, dareere iyo wax kale ee muunad jirta ah, qayb asalka ah oo la isticmaali karo, dhammaan xogta iyo macluumaadka, midkeeda jira iyo midka elektronina ahba, lagu kaydiyo Soomaaliya.

### Qodobka 34

### Hantidhowr iyo Kormeerid

(1) Krommere

(a) Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxa ay magacaabi kartaa qof kormeere u ahaada ujeeddooyinka  Sharcigan ("Kormeere").

(b) Kormeeruhu wuxuu lahaanayaa awoodaha iyo xuquuqaha lagu siiyay Xeernidaamiyaha.

(2) Kaalinta HBS.

Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waa in ay awoodaheeda u isticmaasho, xilalkeedana u gudato hab:

(a) sare u qaadaya wax-ku-oolnimo, dhaqaale iyo nabadgelyada xagga Qofka Ruqsada haysta iyo qandaraas-hoosaadyada xagga ammaanka socodsiinta Hawlgallada Batroolka;

(b) xaqiijiya in Ruqsadleyda ay Hawgallada Batroolka u fuliyaan sí waafaqsan heshiiska isafgarad iyo Hab-dhaqanka Caalamiga ee ugu wanaagsan;

(c) sare u qaadaya tartanka loo tartamayo Hawlgallada Batroolka;

(d) xaqiijinaya daahfurnaanta wiixii la xiriira hawlaha aagga Batroolka;

(e) xaqiijinaya caddaalad iyo isku dheellitirnaanta danaha Xukuumadda iyo ka-qaybgalayaasha kale ee hawlaha Batroolka.

(3) Hantidhowr.

Marka la eego ujeeddada faqradda (2) ee Qodobkan, HBS waa in ay hantidhowrid ku sameyso:

(a) dhammaan arrimaha la xiriira qiimeynta iyo ururinta dakhliga saliidda iyo gaaska;

(b) kharashka ku baxaya baarista, soo saaridda, horumarinta iyo iibka saliidda iyo gaaska.

(4) Galaangal loo helo Buugaagta iyo Xisaabaadka.

(a) Marka la weydiisto Qof kasta oo Ruqsad haysta, waa inuu buugaagtiisa iyo xisaabaadkiisa u diyaariyo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed si ay u hantidhowrto.

(b) Kormeeruhu wuxuu xaq u leeyahay in uu waqti macquul ah:

(I) galo aag, dhisme, dhismo badeed batrool, gaadiid, qalab dhulka ku rakiban, markab, diyaarad, tas-hiilaad, xafiisyo ama dhismooyin kasta ee uu isticmaalo Qof Ruqsad haysta, ama qandaraas-hoosaadle wixii la xiriira Hawlgallo Batrool;

(II) kormeero, tijaabo ka qaado, hantidhowrana, hadba sida ku habboon, hawlaha, qalabka, hawlgallada iyo buugaagta maaliyadeed ee xisaabaha, keyd-qoraalka iyo diiwaannada Qof Ruqsad haysta ama qandaraas-hoosaadle wixii la xiriira ama loo isticmaalo Hawlgallo Batrool;

(III) qaado, dibeddana u saaro Batrool, biyo ama walax kale, ayada oo ujeeddadu tahay in la baaro muunadda;

(IV) baaro, ka qaado wax laga soo dhex saaray, nuqul ka sameysta dokumenti kasta ee la xiriira Hawlgallo Batrool; iyo

(V) sameeyo baaritaanno iyo wax-weydiimo lagama maarmaan u ah in la hubiyo in qodobbada Sharcigan, xeernidaamiyaha iyo Ruqsooyinka loo hoggaansamay.

(c) Qof haysta Ruqsad ama qandaraas-hoosaadle waa in uu kormeeraha intii macquula u fududeeyo, gacana ku siiyo inuu xilkiisa kormeer iyo baaris u guto sí wax-ku-oola kuna guto waqtigii loogu talagay ayada oo la dhowrayo Qodobkan.

**Qodobka 35**

**Dhammaadka Ruqsadda**

(1) Dhammaad.

a. Dhammaadka Ruqsada, sabab kasta ha ku timadee, waxba uma dhimayso xuquuqda iyo waajibaadka ku qeexan Sharcigan, Xeernidaamiyaha ama Ruqsadda ka badbaadeysa dhammaadka, ama xuquuqda iyo waajibaadka bislaaday dhammadka ka hor, iyo dhamman qodobbada ku cad ruqsadda ee lagama maarmaanka u ah in sí buuxda loogu nacfiyo iyo la taabbo-geliyo xuquuqdaas iyo wajibaadkaas ka badbaaday dhammaadka ilaa waqtiga lagama maarmaanka ah.

b. HBS waxay awood u leedahay in ay Ruqsad soo-afjarto hadba sida ku cad Ruqsadda.

(2) Wadar Ruqsadley ah.

a. Haddii dhowr Qof ay wada-haystaan hal Ruqsad oo ay soo ifbaxaan duruufo dhaliya in HBS ay doorbiddo dhammaad Ruqsad, taas waxa ay saameyneysaa oo kaliya Dadka Ruqsada haysta ee falkooda ama ka-baaqsigooda ay keeneen duruufahaas, waxayna sidaas ku wargelineysaa shakhsiyaadka kale ee Ruqsadda ku haraaya.

b. Haddii ay dhacdo in HBS soo-afjarto Ruqso mudadeed, sida ku cad faqradda (1) ee Qodobkan, hay'addu waxay Dadka Ruqsada haysta, ee soo haray, siineysaa xaq mudnaan in ay gataan saamiyada muddadooda la soo-afjaray, ayada oo loo eegayo sida ay u kala lahaayeen saamiyadooda. Saamiyada aanan la qaadan waxay u noqonayaan Dowladda Soomaaliyeed.

## Qodobka 36

## Beri-yeelid Xukuumadda, Wasaaradda iyo HBS

(1) Ka beri-yeelid (indemnification)

Qof kasta oo ruqsad haysta waa inuu:

a. Difaaco, ka beri-yeelo, ka fogeeyo Xukuumadda, Wasaaradda iyo HBS wixii dacwo ah oo ay ku furaan dhinacyo saddexaad ee ka dhashay, si toos ah ama dadban, Hawlgallo Batrool, bixiyaanna dhammaan wixii magdhow ah ee la xiriira wixii mas'uuliyad dacwooyin madani ah, sheegasho ama dalab intaba; iyo

b. Marka laga reebo in ay Wasaaraddu ku qanacday, kaddib la-tashiga Qofka Ruqsadlaha ah, in mas'uuliyadda ka iman karta ee faqradda (1)(a) ee qodobka 36 lagu dabooli karo habab kale, ay ku jiraan in lagu soo rogo damaanado shirkad ama damaan bangi ama warqado heegan(standby letters of credit), Wasaaraddu waxay ku waajibineysaa Ruqsadlaha in la geliyo caymis dabooli kara qaansheeg u dhigma khasaaraha.

## CUTUBKA VI - MACLUUMAAD SHAACSAN

### Qodobka 37

### Faafinta HBS

(1) Faafin

HBS waxay Faafinta Rasmiga ku faafineysaa:

(a) Ogeysiiska bixinta Ruqsooyinka iyo shuruudaha Ruqsooyinkaas oo kooban;

(b) Ogeysiis dadka loogu yeerayo in ay soo qortaan codsiyo ay ku weydiisanayaan Ruqsooyin, ayada oo la raacayo faqradda (1) ee Qodobka 20; iyo

(c) Ogeysiiska dhammaadka Ruqsooyinka.

(2) Faafiin uyeerid codsadayaal.

HBS waxay warbaahinta ku faafineysaa ogeysiisyo ay dad ugu yeereyso in ay soo qortaan codsiyo ay ku weydiisanayaan Ruqsooyin, ayada oo la raacaayo faqradda (1) ee qodobka 20 sida uu qabo Xeernidaamiyaha.

### Qodobka 38

### Macluumaad Shaacsan

(1) u-bandhigid Dadweyne.

a. Hay'adda Batroolka ee Soomaaliyeed waa in ay dadweynaha u bandhigto:

(i) Shuruudaha dhammaan wixii Ruqsooyin ah ee kooban iyo wixii isbeddel ah ee lagu sameeyey ha ahaadeen kuwo la dhammeeyey ama yeysan ahaan;

(ii) Wixii faahfaahin ka-dhaafid ah ama wax-ka-beddel ama laalid ah, shuruudaha Ruqsada ee qodobka 28; iyo

(iii) Nuqullada  dhammaan Heshiisyada Mideynta;

(iv) Nuqullada qiimeynta saameynta xag bii'ad iyo xag bulsho.

b. HBS waxa ay dadweynaha u bandhigeysaa, waqti macquul ah gudihiis, codsi kasta oo loo sameeyey ujeeddadaas, faahfaahin kooban ee:

(i) Qorshaha horumarinta ee la ansixiyey; iyo

(ii) Dhammaan wixii qoondooyin ah iyo wixii faahfaahinno kale ah oo la oggolaaday  wixii la xiriira Ruqsooyin, ayada oo ay ku xiran tahay wixii kalsooni ganacsi ah iyo weliba wixii shuruudo ganacsi ah.

(2) Faafinta Sababaha

Codsi haddii la sameeyo 30 maalmood gudahood, HBS waxa ay faafineysaa sababo kooban ee la xiriira:

(a) wixii bixin Ruqsad ah ee ka dabeeyey ogeysiiska, sida lagu sheegay faqradda (1) ee Qodobka 21;

(b) wixii bixin Ruqsad ah ee la sameeyey ayada oo aan dadka loogu yeerin in ay soo qortaan codsiyo, sida lagu sheegay faqradda (12) ee qodobka 21;

(c) wixii ansixin qorshe horumarin ee la xiriira Heshiis Wax soosaar Wadaag;

(d) bixin ka-dhaafid, ama oggollaansho wax-ka-beddel ama ah laalidda shuruudaha Ruqsad lagu bixiyey sida lagu sheegay Qodobka 28; iyo

(e) sameyn go'aan kasta ama bixin ansixin kasta, taasoo, sida ku cayiman Ruqsad, u baahan in la faafiyo.

(3) Warbixinnada Buuxinta Shuruudaha.

(a) Dadka haysta Ruqsad waa inay soo gudbiyaan warbixin la xiriirta u hoggaansamida ama buuxinta shuruudaha ku xusan Sharciga iyo Ruqsadaha si waafaqsan habka iyo faahfaahinta ay waajibiyeen ruqsadooda iyo Xeernidaamiyaha.

(b) HBS waxa ay dadweynaha u soo bandhigeysaa warbixinnada kor ku xusan, marka laga reebo qaybo warbixinnadaas ka mid ah oo ay shaqsiyaadka Ruqsada haysta ay dalbadeen in ay sir u ahaato, Hay'adda Batroolka Soomaaliyeedna ay u aqoonsato sir ganacsi.

(4) Khidmada Galaangalka.

Macluumaadka ku xusan Qodobka 38 waa in loo bandhigo Qof kasta ka dib markii ay bixiso khidmada, sida lagu xusi doono Xeernidaamiyaha.

(5) Afke

Macluumaadka ku xusan qodobka 38 aad waa in ay ku qornaataa Afka Soomaaliga ama Afka Ingiriiska.

## Qodobka 39

## Daah ka qaadista iyo faafinta dhaqaalaha baxay.

(1) Mabaadída Daahfurnaanta

(a) Shakhsiyaadka Ruqsadleyda ah iyo qandaraas-hoosaadleyda waa in ay si sannadle ah u soo bandhigaan macluumaadka ku saabsan lacagaha ama wixii lacag u dhigma oo ay siiyaan Xukuumadda iyo haya'daha Xukuumadda, lacag ha ahaato ama cayn ee la xiriira Hawlgallo Batrool, si waafaqsan sharciga nidaamiyaha;

(b) Dhammaan waxyaabaha la soo bandhigayo, ee ku cad qodobkan, waa in warbixin laga siiyo hay'ad maamul ee madaxbannaan, waana in ay noqdaan kuwo la faafiyo, lana xaqiijiyo, sí waafaqsan mabaadii´da daahfurnaanta, sida ku qeexan xeernidaamiyaha;

(c) Dhammaan kharashaadka baxay iyo dakhliga soo xarooda waa in la mariyo hantidhowr madaxbannaan ee lagu kalsoon yahay ee adeegsanaya halbeegyo hantidhowr caalami ah;

(d) Dhammaan kharashaadka baxay iyo dakhliga soo xarooday waa in uu iswaafajiyo maamule madaxbannaan oo ay magacawday Xukuumadda, isagoo dhaqan gelinaaya halbeegyo hantidhowr oo caalami ah iyo faafinta ra'yiga maamulaha oo la xiriita iswaafajinta oo ay ku jiraan farqi, haddiiba ay soo if-baxaan;

(e) Qodobbada xog- ilaalinta ama kuwa kale ee ku xusan Ruqsad kana horimaanaya faafinta macluumaadka ee ku saabsan bixinta kharashka lacagta khidmada ah iyo dakhliga ka soo xarooda Hawlgallada Batroolka ee laga fuliyey dhulka Soomaaliya gudahiisa waxa ay noqonayaan kuwo wax kama jiraan ah ilaa xadka loogu baahnaa faafinta macluumaadka noocaas ah ee lagu tilmaamay faqradda (1);

(f) Wasaaraddu waxa ay soo saari kartaa xeernidaamiye ku saabsan dhammaan arrimaha la xiriira soo bandhigidda iyo faafinta macluumaadka ku qoran Qodobkan, oo ay ku jiraan amarrada ku socda hay'adaha maamul ee doonaya sí ay u bixiyaan macluumaadka la xiriira bixinta kharashaadka iyo dakhliga.

(g) Mabaadii'daan waxa ay ku dabaqmeysaa Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (ShBQS) iyo qandaraasle kasta oo kale oo ay Dawladda leedahay.

## CUTUBKA VII - XEER NIDAAMIYE IYO TILMAAMO

### Article 40

### Xeernidaamiye

(1) Awood Soo saarid Xeernidaamiye.

Wasaaraddu, ayada oo ku saleyneysa tala-bixinta iyo tala-jeedinta HBS, waxa ay soo saareysaa xeernidaamiye lagu fulinayo Sharcigan ee la xiriira arrimaha soo socda:

(a) Xirmooyin u kala qaybinta dhulka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;

(b) Baaritaanka iyo horumarinta iyo soo saaridda Batroolka;

(c) Adeegsiga xog, macluumaad, keyd-qoraallo iyo warbixinno;

(d) Cabbiraadda iyo iibinta ama bixinta batroolka, ay ku jiraan miisaamidda, jarribaadda iyo magdhabidda, haddii uu dhaco cabbir-wareer;

(e) Dhammaan arrimaha la xiriira ammaankaa, maareynta wasakhda iyo bii'ada iyo ka hor-tagga khaaska u ah hawlaha batroolka, ay ku jiraan cayimaadda aagag ammaan iyo tillaabo kasta oo lagu xoojinayo aagagga ammaan, u-diyaargarowga xaalad degdega iyo tillaabooyinka la xiriira xaaladda degdegga iyo qaabka, nuxurka iyo shuruudaha kale ee la xiriira iyo qiimeynta saameynta bii'adeed iyo bulshadeed;

(f) Maareynta khayraadka;

(g) Dhismooyinka, tas-hiilaadka iyo wixii qalab rakiban ah;

(h) Nadiifinta ama tillaaboyin kale ee maaro u helidda saameynta eelka baxsadka batroolka;

(i) Ka guuritaanka iyo tafkiigga, ay ku jirto dejinta qaab la xiriira miisaaniyadda tafkiigga;

(j) barnaamijyada shaqada iyo miisaaniyadaha.

(k) Kasbasho xuquuq dhul ama dhul bannaan oo cid kale leedahay ee loo adeegsanayo fulinta Hawlgalla Batrool, ay ku jiraan shuruudaha loogu baahan yahay xag la-tashi iyo wargelin iyo kontroolka tariifada loo dejiyey galaangalka dhinac saddexaad;

(l) Hantidhowridda Qof haysta Ruqsad iyo xissabihiisa iyo keyd-qoraaleedyadiisa;

(m) Keyd-qoraaleed, warbixinno iyo macluumaad, oo ay ku jiraan shuruudaha nuxurkooda, gudbintooda iyo hayntooda la xiriirta:

(i) Tababarka iyo shaqaaleynta muwaadiniin Soomaali ah,

(ii) Iibsiga badeecooyin iyo adeegyo soomaaliyeed.

(n) Khidmado la bixiyey, ay ku jiraan kuwa ay bixiyeen codsadayaal Ruqsado, Dad haysta Ruqsado, dad raba in ay baaraan oo waxyaabo ka fiiriyaan Diiwaanka Batroolka, ay ka mid yihiin qaddarka khidmadaha la qaaday iyo sida loo xisaabiyey;

(o) dhisitaanka iyo shuruudaha nidaam ee la doonayo Qof haysta Ruqsad, ay ku jiraan shuruudaha laga doonayo Qofka haysta Ruqsada xag raasumaal iyo maareyn iyo ka-qaybgalka Shirkadda Batroolka ee Soomaaliyeed;

(p) Leysanno lagu rakibo, loogana shaqeeyo nidaamyada xagga daabulaadda;

(q) galaangalka dhinac saddexaad u yeelanayo tas-hiilaadka xagga daabulaadda, habeynta iyo keydinta ee Batroolka, ay ku jiraan shuruudaha lagu bixiyey oggolaansha galaangaka;

(r) shuruudaha nidaamka maareynta oo ay ku jiraan shuruudaha eek u saabsan tababrka iyo aqoonta xifadeed, ikhtisaaska iyo jinsiyadda Guddiga Sare, maareynta shaqaalaha iyo dadka qandaraashooslayaaka eek u hawlan qalqaalada badeecooyinka iyo adeegyada iyo tababaridda Saraakiil Dawladeed iyo ka-dhaafidda dadkaas shuruudahaas laga doonaayey;

(s) waxyaabaha loo badhigo dadweynaha iyo hubinta/xaqiijinta keyd-qoraaleedyada, warbixinnada ama macluumaadka loo gudbiyey Wasaaradda iyo HBS, oo ay ku jiraan qaabka, oggolaanshaha iyo muddeynta shaacinta ay sameynayaan hay'adaha maamulka in ay keenaan macluumaad la xiriira bixinta khidmadaha;

(t) ajuurada kirada dhulka bannaan iyo khidmadaha kale, gunnoyinka iyo royaltiga, oo ay ku jiraan cayimaadda qaddarka lacagaha khidmada iyo habka loo xisaabintooda, ururintooda iyo dadka ay ku waajibaan khidmadaha, gunnoyinka iyo royaltiyada noocaasa;

(u) nuxurka iyo waxtarka maxalli ah;

(v) arrin kasta oo kale oo ay Wasaaraddu u aragto lagama maarmaan ama habboon sí loo fuliyo qodobbada Sharcigan.

(2) Mabaadída Xeer-udejinta.

Marka ay xeernidaamiye dejineyso, Xukuumaddu waa in ay, intii suurtagala, adeegsato halbeegyada caalamiga ee la isla oggolyahay.

(3) Faafinta Xeernidaamiyaha.

Wasaaradu waxay Xeernidaamiyaha ku faafineysaa Faafinta Rasmiga

**Qodobka 41**

**Tilmaamo**

Marka lagu daro awoodeeda ah in ay bixiso tilmaamaha ku xusan faqradda (4) ee Qodobka 19 iyo faqradda (1)(c) ee Qodobka 27, Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay Qof kasta, oo haysta Ruqsad, siin kartaa tilmaam:

(a) la xiriirta arrimaha ku xusan faqrada (1) ee Qodobka 40; ama

(b) ama si kale looga dalbaayo u-hoggaansamidda Sharcigan, Xeer nidaamiyaha ama Ruqsadiisa.

**CUTUBKA VIII - QAWAANIIN DEMBI IYO CIQAAB**

**Qodobka 42**

**Baaxadda Dhul iyo Maaddo ee Cutubkan**

Qawaaniinta Cutubkan waxba uma dhimayaan mas'uuliyadda ciqaabta iyo madaniga ee ku cad Sharuucda Guud.

**Qodobka 43**

**Dembiyada**

(1) Dembiyada

Dembi ayuu gelayaa qofka:

(a) asaga oo og sameeya diiwaangeli ama caddeyn been-abuura ku dara warbixin, keydqoraal ama dokumenti looga baahan yahay, marka la eego Sharcigan ama Xeerhoosaadyada ama amar, tilmaan ama heshiiyo ay sameysay Wasaaradda ama HBS, ayada oo la raacato Sharcigan ama Xeerhoosaadyada;

(b) asaga oo og burburiya, dhantaala ama bee-abuura warbixin ama dukumentiyo kale ee loo baahan yahay, ayada oo la raacayo Shacigan ama Xeerhoosaadyada ama amar, tilmaan ama heshiis ay gashay Wasaaradda ayada oo raacaysa Sharciga ama Xeerhoosaadyada;

(c) Cid kasta ee la timaada hab-dhaqan khilaafsan axkaamta Sharcigan ama Xeerhoosaadyada halis geliya nafta iyo dhammida jir ee qof, halis geliya hanti qiime sarreysa, ama sí culus halis geliya bii'ada; ama

**(d)** dhiga, keydiya, ama kab u ah dhigaal iyo keydin Batrool ama walax meel taal asaga oo ula jeedo in uu marin habaabiyo qof kale xagga suurtagalnimada keyd batrool ee ku jira meeshaas.

(2) Ku xadgudubka Sharciga.

Dembi ayuu gelayaa qofka:

(a) ku xadgudba Sharcigan, Xeerhoosaadyada, Ruqsada ama Ruqsad kasta oo kale oo la bixiyey ayada oo laraacayo Sharcigan, Xeerhoosaadyada ama amar, tilmaan ama goáan ay gaarta Wassaradu; ama

(b) ku dhaqaaqa ama fuliya Hawlgallo Batrool Ruqsad laáan ama Ruqsad kasta oo kale oo la bixiyey ayada oo la raacayo Sharcigan**,** ayada oo aan loo hoggaansamin qodobbada iyo shuruudaha Ruqsada.

(3) Ishortaagis Sarkaal Dawladeed.

Dembi ayuu gelayaa qof kasta oo:

(a) asaga oo aan haysan cudurdaar maangala ishortaaga, carqaladeeya, caqabad ku noqda Sarkaal Ddawladeed oo adeegsaya awoodaha uu siinayo Sharcigan; ama

(b) asaga oo og ama asaga oo aan u aabayeelin sameeya caddeyn ama soo saara dokumenti been-abuura ama marin-habaabinaya Sarkaal Dawladeed ee ku hawlan fulinta waajibaadkiisa ama xilalkiisa ku xusan Sharigan.

(4) Is-hortaag Qof haysta Ruqsad.

Qof kasta, oo asaga oo haynsan cudur-daar, hor-istaaga, carqaladeeya, caqabad ku noqda ama ka-horjoogsada Qof haysta Ruqsad in uu sameeyo fal kasta ee uu qofka Ruqsada haysta uu u saamaxayo Shacigan ama u-saamaxayaan Xeerhoosaadyada, waxa uu gelayaa dembi.

(5) Sarkaal Dawladeed.

Sarkaal Dawladeed oo ku hawlan hirgelinta sharcigan waa in aanu, gaar ahaantiis, sí toosa ama dadab ah, kasbin, isku deyin in uu kasbo ama ku yeesho:

(a) dana ku cillan Ruqsad ama Ruqsad kasta oo kale ee la bixiyey ayada oo la raacayo Sharcigan ama Xeerhoosaadyada;

(b) dan dhaqaale, toos ama dadab, dan ka-qaybgal ama saami shirkad xaq u leh, marka eego Sharciga, in ay Hawlgallo Batrool ka fuliso Dhulka Soomaaliya; ama

(c) dan dhaqaale, toos ama dadab, dan ka-qaybgal ama saami shirkad badeecooyin iyo adeegyo ka iibisa Qof Ruqsad ku haysta Sharcigan.

(6) Dembi lid ku ah Adeeg Caam ah.

Qofka ku xadgudba faqrada (5) ee Qodobkan waxa uu gelayaa dembi.

(7) Difaac.

Marka lagu dhaqaaqo oogista dembi ku qeexan Qodobkan, kaas oo ah in la kasbo ama yeesho dana nooca lagu xusay faqrada (5) ee Qodobkan, waxaa difaac ku filan noqonaya, haddii qofka la eedeeyey caddeeyo:

(a) in dantaas lagu kasbay sifo sharci ah; iyo

(b) in la qaaday ama ay socdaan dhammaan tillaabooyinka lagama maarmaanka in dataas la wareejiyo.

(8) Denbiyada ay Shirkad gasho.

Haddii dembi ay gashay shirkad ee la caddeeyo in lagu galay rabitaan ama ku lug lahaanshaha, ama loo tiirinayo taxaddir laáan ka dhacday xagga ruux ka ah agaasime, maareeye, xoghaye ama sarkaal la mida ee shirkad sheeganaya in uu matalayo, asagaas waxa uu galayaa dembigaas, sidaasna loogu oogayaa, mas'uulna kaga noqonayaa.

(9) Ammarro Dheeraada.

Haadii qof lagu xukumo dembi ku xusan Sharcigan, Maxkamaddu, in ay ku xukunto ciqaabta uu dhigayo Sharcigaan ama sharci kale ka sokow, waxay soo saari kartaa:

(a) amar diidaya in la celiyo lacago, xaashiyo qiime lacageed ku cillan yahay, qoraallo, tas-hiilaad, baabuur. Diyaarado, maraakiib ama qalab kasta oo loo adeegsaday gelidda dembiga; iyo

(b) amar ah:

i. in aan loo celineyn wixii batrool ah ee uu helay ama soo saaray inta lagu gudajiray geliidda dembiga;

ii. in qofkaas uu Xukuumadda siiyo qaddar lacag ah ee la eg qiimaha ka soo baxo iibka tirada batroolka uu ka helay ama la soo saaray;

iii. inuu qofkaas siiyo Xukuumadda qiimaha ceelka, ee ay maxkamaddu qiimeysay , ee ay maxkamaddu qiimeysay xagga wixii la xiriira tirada la soo saaray ama bixinta qayb ka mida qaddarkaas lacagta ah oo ay maxkamaddu, ayada oo tixgelineysa dhammaan duruufaha, ay u aragto mid habboon.

(10) Fulin La'aan.

Haddii maxkamaddu ay ku qanacsan tahay in amar la bixiyey, ayada o la raacayo xarfaha (b)(i) ee faqradda (9) ee Qodobkan, aan la fulin Karin sabab kasta oo ay tahay, maxkamaddu, ayada oo tixgelineysa codsiga qofka dacwoodaha ahi, waxa meel ku tiirin kartaa amarkaas, waxayna soo saari karta amarka ku xusan xarfaha (b)(ii) ama (iii) ee faqradda (9) ee Qodobkan,

(11) Awaamir Dheeraada.

Haddii qof lagu xukumo dembi ku xusan Sharcigan, Maxkamaddu, ciqaabta kasta oo kale ee ay ku xukumi karto ka sokow, waxay kartaa inay:

(a) amarto in qofkaas uu u hoggaansamo Sharcigaan, Xeerhoosaadyada, amar kasta, tilmaan la bixiyey, ama waxa ay farto Wasaaradda ama HBS iyo qodobbada ama shuruudaha Idanka/Ruqsada oo khilaafkooda dartiis xukun loogu riday;

(b) amarto in qofkaas, sí ku meel gaara, looga qaado xaqa ka-qaybgal tartamada qandaraasyada khuseeya Hawlgallo Batrool, gaar ahaan kuwa khuseeya Idamada/Ruqsadaha iyo iibinta badeecado iyo adeegyo;

(c) amarto in la joojiyo Idamada/Ruqsadaha la siiyey qofka.

**(12) Ciqaab Shakhsiyaad.**

Haddii qof lagu xukumo dembi ku xusan Sharcigan, qofka lagu helo wuxuu muteysanayaa ganaax aan ka badnayn shan milyan dollarka Mareykanka ama xarig muddadiisa aan ka badnayn shan (5) sano ama labada oo la isugu raacsho.

**(13) Ciqaab Shirkado.**

Haddii shirkadu gasho dembi ku xusan Sharcigaan, shirkadda lagu helo waxa ay muteysanaysaa ciqaab ganaax Shilin Soomaali ah ee u dhiganta toban milyan dollarka Mareykanka.

**(14) Ciqaabo Maalmeed la Xiriira Wasakhayn Bii'ada.**

Haddii la galo dembi ka mida dembiyada ku xusan Sharcigaan oo ay ka dhalatay wasakhayn bii'ad, ee hal maalin ka badan ama socotay hal maalin wax ka badan, waxaa loo qaadanayaa in in uu ka ratibmaayo dembi gooni ah, dembigaas oo mid la galayo maalin ama geliddiisu tahay mid socoto.

**(15) Dembiyo la xiriira Musuqmaasuq.**

Dembi ayuu gelayaa qof kasta, ee asaga oo ku sugan Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya gudahiisa ama dibeddisa:

(a) asagu weydiista ama cid kale u weydiiya ama qaata wax aanu xaq u lahayn ama oggolaada wax nacfi la xiriira jago, xafiis am axil uu haayo, ha ahaado mid gaara ama guud;

(b) asagu weydiista ama cid kale u weydiiya ama qaata wax aanu xaq u lahayn ama oggolaada wax nacfi oo la siiyey, ayada oo ujeeddadu tahay in laga dhammaysta waxqabad la xiriira jago, xafiis iyo xil uu haayo, ha ahaado mid gaara ama mid guud;

(c) bixiya ama siiya qof nafac aan habboonayn eek u xiran jago, xafiis iyo xil uu haayo;

(d) asagu weydiista ama qof u siiya dano aan habbonayn ayada oo la dhaafsanaayo waxqabad ku xiran jago, xafiis ama xil, aanu xaq u lahayn ama oggolaada wax nacfi oo la siiyey, ayada oo ujeeddadu tahay in laga dha ha ahaado mid gaara ama guudmmaysta waxqabad la xiriira jago, xafiis iyo xil uu haayo.

## CUTUBKA IX - QAWAANIIN DHAMEYSTIR IYO KUWO KALE

### Qodobka 44

### Qodobbada kala guurka

(1)Heshiisyadii Hore

(a) dhamaan heshiisyadii la xiriirey batroolka ee la saxiixay ka hor 30.12.1990 waa in loo bedelo Heshiis Wax soosaar Wadaag.

(b) Wasiirku wuxuu soo saarayaa xeernidaamiye lagu dejinaayo habraaca maamuleed ee la raacaayo iyo waajibaadka heshiisyada ka waajibay ee fulintooda laga sugaayo shakhsiyaadka kusoo jiray ama hadda ku jira Hawlgalo Batrool (Heshiisley-dii Hore) oo la xiriira xuquuq ka dhalatay Ogolaansho ay bixisay Jamhuuriyadda Dimoqraatiga ee Soomaaliya ka hor ama 30.12.1990. Xeernidaamyadaasi waa in ay ku jiraan quwaaniinta soo socda:

(i) Heshiislaha Hore waa in loo aqoonsado xuquuq ubedelid Heshiiskii Hore qaab Heshiis Wadaag Waxsoosaar. Heshiislaha Hore ee codsanaya ubedelid Heshiiskii Hore qaab Heshiis Wadaag Waxsoosaar waa in uu u keeno Wasaaradda:

(a) nuqul la xaqiijiyey ee Heshiiskii Hore oo si buuxda loo fulieyey;

(b) caddeyn Wasaaraddu ay ku qanacsan tahay oo ah in Heshiislaha Hore ahaa mid si buuxda u gudanaayey waajibaadkiisii, si waafaqsan Heshiiskii Hore, taariikhdu markii ay ahayd 30.12.1990;

(c) nuqul raadraaca hawlihii laga rabay in uu fuliyey si waafaqsan Heshiiskii Hore, oo ay ku jiraan wixii ka Guuris qaybo ka mid ah Aaga Heshiiskii Hore quseeyo;

(d) nuqul dhammaan macluumaadka iyo akhbaarta uu Heshiiskii Hore waajibiyey in loo soo gudbiyo Xukuumadda;

(e) tilmaanta shakhsiyaad-ka wakhtiga hadda ah qayb ka ah Heshiiskii Hore, iyo sida ay ugu xaq yeesheen ka qayb ahaanta Heshiiskii Hore ee asalka ahaa;

(ii) in uu ogolaado in waajibaadkiisa Furfuridda ee heshiiska cusub ay ku jiraan waajibaadka Furfuridda hawlihii la fuliyey si waafaqsan Heshiiskii Hore;

(iii) saxiix sharuudaha Rukhsada cusub ee uu dhexeeya Heshiislihii Hore iyo Wasaaradda ee la galay maalinta ama ka hor Wasaaraddu timaanto, taas oo aan ka dib dhici karin taariikhda ku xusan Qodobka 44(3) ee Sharcigaan.

(2) Dadaal la Xiriirid.

Wasaaraddu waa in ay sameysaa dadaal maangal ah oo ay kula xiriireyso mid kasta oo ah Heshiisle Hore si ay ugu wargeliso xuquuqdooda ku cad Qodobka 44 (1). Haddii Heshiiskii Hore u muuqdo mid ay ka dhinac ahaayeen in ka badan Hal Qof, Wasaaraddu waxay sameyndoontaa dadaal maangal ah si ay ula xiriirto Shakhsiga ula muuqda in uu yahay Hawlfuliye.Ma jiro Heshiisle Hore oo wax xuquuq ah ku yeelan kara Wasaaradda ama Xukuumadda si la xiriirta fashil fulin Faqrada (2) ee Qodobkaan, haddii Wasaaraddu ay ku iclaamisay Faafinta Rasmiga ogeysiin soo sheegasho ee ku socda Heshiisyadii Hore.

(3) Haddii Heshiis Hore aan loo bedellin Heshiis Waxsoosaar Wadaag , sida Sharcigaan ku cad oo waafaqsan qawaaniinta Faqrada (2) ee Qodobka 44, sannadguurada koowaad ee dhaqangalka Sharcigaan, sida soo socota ayey ahaan:

(a) Heshiiskii hore waa uu dhammaanayaa waxaana joogsanaaya waajibaadkii Xakuumadda maalinta koowaad ee sannad guuradda dhaqangalka Sharcigaan;

(b) Dawladdu mas'uul kama noqoneyso wixii khasaare, kharash, dacwo ama dhibaato uga ka timaado gabagabeynta Heshiiskii Hore;

(c) Si Qaranimo ah, wax kastoo ku qoran heshiiska, Xakuumaddu waxay caddeyneysaa in ay ka xasaanad leedahay dacwo kasta oo uga timaada Heshiisle Hore oo ku saabsan gabogabeynta Heshiis Hore.

**Qodobka 45**

**Burin**

(1). Waxaa si gaara loo buriyey Sharciga Batroolka Soomaaliya ee L.XGB/712/08 iyo qaybta IV-Hydrokarbonnada ee Sharci L. 7 ee 9 Jannuary 1984 ee ansixiyey Koodisha Macdanta, iyo xeernidaamyada la xiriira. Waxaa la baabi'iyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigaan

**Qodbka 46**

**Dhaqangal**

Sharcigaan wuxuu dhaqagelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga.